


C/risaaq Cumar
GAAB



Khalad marag madoon-
To ah bay ku aragtay
Kay weheshanaysay,
Inay ka goosato
Bayna go'aan ku
Gaartey. Laakiin, fal
Kasta oola qabanaayo.




# In La Hubsado Haboonaa!!

Sahra intay isku qosashay ayay ka codsatay inay in yar soc-scodaan xeebta dhinaceeda. Goortii ay wax yar socdeen ayayna waydiisay.

"Xasan, aboowe ma ku su'aali karaa waxa kugu qaabay inaad na soo dalxiisiso?" Ayadoo xishoonaysa.

"Sahro walaal, marka dhabta loo hadlo waxaa tahay qof aan aad u xiisaynaayay, una xushmaynaayey tan iyo barshadeenii. waxaa kaliya oo aan rabana waa farxaddaada. Umana malaynaayo inaan joojinaayo taa, waayo arigtida aan kugu arkaayo adoon faraxsanayn ayaa waxay sii dhawaynaysaa waali." Sahro hadalkii dabacsanaa ayaa jiiray, intay is hayn waysay ayayna ku soo boodday, iskuna martay wiilkii dhinaceeda socday, sidii geedka saarka oo kale. Cod qafiif ahna ku tiri.

"Xasan — waan -- ku jeclahay."

"Ma anigaa ku jecel, mise adiga?" Ayuu su'aalay, isagoo isku adkeynaaya sidii inay ka fakanayso.

Taxanaha Buugaagta MAC wuxuu idiin soo gudbinayaan dhawaan.

1. MAX'ED KHALIIF JAAMAC
   Ha rajo dhigin
   Hawo Geddis
   Hagar-daamo

2. AADAN MAX'ED JIMCAALE
   Cirro Ugub
   Shaydaan Guudle
   Mar La'arag

3. C/RISAAQ CUMAR GAAB
   In la hubsado Haboonaa
   Kaaf iyo kala dheeri
   Calaf

Wixii qaladaad ah, ama talo ah ama tusaalayn ah ee la xiriira buuggaagta ku soo dir cinwaanka.

C/RISAAQ CUMAR / MAX'ED KHALIIF
C/O P.O. BOX 7888 / 6244
MOGADISHU , SOMALIA.

# In La Hubsado Haboonaa !!

W.Q: C/risaaq Cumar Gaab

DAABACAADII KOOWAAD OKT 1988 XAMAR

Waxaan ka efeefanaayaa in aan buugga dadka aan ku soo qaatey iyo magacyada aan ku xusayba aan ay ahayn kuwa sitoos ah u khuseeyo ama dadbanba dad nool iyo moodba.

Wixii u ekaansho ah dabeecadaha aan buuga ku soo qaatey ma aha wax ogaansho aan u yeelay buugga dhamaantiisna waa dhalanteed.
dhalanteed.

Si niyad leh waxaan ugu hibaynaayaa buuggaan walaalahay Nasro Cumar Gaab; Fawsiyo Max'uud Cusmaan iyo gaar ahaan habaryartayda qaaliga ah Sacdiyo Xasan Cali.

Waxaan si kalgacaltooyo leh ugu mahad-naqayaa Shariif Muriid Shariif Axmed; C/llaahi Siciid Max'ed; C/shakuur Mire Aadan; C/raxmaan Cusmaan Yuusuf (Coof); Cabdi Xasan Cali iyo Sawir-qaadaha Isboortiga ee da'da yar Yaasiin Cusmaan Xuseed, oo aan la'aantood waxba ii hirgaleen.

## CUTUBKA KOOWAAD

Cali Mire wuxuu soo garaacay albaabkii qolkii cariishka ahaa ee uu kula noolaa xaaskiisii halka wiil u haysay, dadka socda waqtigaana aad iyo aad bay u yaryihiin. Sideedabana wuxuu caado ka dhigtay baryahaan danbe inuu waqti xun soo seexdo.

Naagtiisii ayaa ka furtay iyadoo aad wajigeeda kagaranayso sida ay uga xun tahay arimaha ama dabeecadaha qalafsan ee ay ku aragtay dhawaanahan.

"Caliyow; ma saanaad dan mooday?" ayay way diiday kolkii uu soo dhaafay ilinkii, isagoon eegin jawaabna u dalicin ayuu ku dhaqaaqay dharka iska bixintiisii.

"Maad ii jawaabtid waa adiga is qaafinaayee", ayay ku celisay mar labaad, iyadoo ciil awgii cunihii xirmay, raacisayna awalbaa safar kaagu badnaa, marka ma inrii yarayd ee aad nala joogtay ayaan saan door biday?" iyadoo uu hadalku ku culus yahay, Run bay ahayd waayo Cali mire wuxuu ahaa darawal wada gaari kamid ah gawaarida aada dhinaca gobolada koon fureed ee safarada.

"Anigu nac nac uma baahni saacadan ee haday hurdo ku hayso seexo", ayuu ku yiri isagoon wali kor u fiirin.

"Ma waajib baan kaaga helay inaad sidaa iila hadashid?" ay su'aashay, iyadoo isu haysata inay codkeedii ugu danbeeyay ku

qaylinayso,balse aanu saaniba uga soo wada bixin."Wallee hadaad iskukulayso aduun baa ku dhib qaba""ayuu yidhi isagoo saribirta isku sii tuuraya.

"maxaad iigu ribaynaysaa su'aal baan ku waydiiyee".

"Waayo hadaanay sidaani ku anfacayn waad iskagatagaysaa aqalkaan".

Furkiin bay tuurtay,hadana xx is qaboojisay kaligeed.

"Ujeedadaadu mayaan la i waydiin su'aal baa?"ayay ugu danbayntii tiri.

"Qaylo badan ma doonaayo anigu,ee da hadal hadaad rabto ogow inaadan gurigan ku sii raagayn",ayuu yidhi isagoo isku sii rogaaya go'iisii waynaa,wax tix galin ahna aan siinayn qofka dul taagan,walibana aan dhadhaminayn waxa afkiisa ka yeeraaya.

War waxaad dhahayso(leedahay)nin wayni kuma hadlee sida isu dhaan".

"Ikoon tabool anigu kuma oran,ee xasuusnow inaan ula jeeday waxaan iri oo dhan"?

"goor muu go'aan kaasina kugu ahaa?"ayay su'aashay iyadoo qosol gariiraysa.

"Saacadaa lajoogo ayuu si kulul ugu jawaabay,wax danbe oo naga dhexeeyaana ma jiraan",ayuu waliba ugu sii booteeyay.

"War maad kadaysid ayay tiri iyadoo u malaynaysa inuu ku kaftamaayo.

"Maxaad ii siyaadinaysaa oon dhib ahayn hadaad guri ii sii joogtid".?



"Walaal ii kaadi haddii qaraarkaaguba halkaa gaaray anaan jeclayn inaan dadka dhibo "Ku jiifo inaad bari subax qabanayso guriga hooyadaa".

"koley adiga ii tilmaan kuma lihi, hadaad heerkaa joogto ayay si go'aansasho ah u tiri.Waxay wajiyadoodii u kala jeediyeen bari iyo galbeed.wuxuu waagu ugu baryay iyada oo iska ilmaynaysa,isagana wa fakar iyo daaro aan la arkayn dhisidood.Alasaydii hore yuu u sheegay inay isu diyaariso maxkamadda gobolka. Boorso yar ayay ku soo ridatay waxay dhar lahayd iyo wixii wiilkeedu lahaaba, horayna u soo xanbaaratay wiilkeedii yaraa. Sagaalkii subaxnimo ayaa ilaahay u soo kala fududeeyay.Labadii xalay wada s seexataa saakana dhabarka istusaaya.

Boosteejadii afara irdood ee laga raacayay baabuurta waqooyi ayay soo abaartay. Saacad barkeed ayay ku timid halkii ay ku socotay;nasiib xumase waxay kala garan wayday gawaa dhidii meesha tubnayd,gaar ahaan kuway raaci lahayd halkay taagnaayeen.

"Abaayo"ayay ugu yeertay gabar ay qiyaas ahaan isku da'ahaayeen.

"Ma iga tusi kartaa gawaadhidaas kuwa aada B/weyne,adoo iga raali ah?" bayna ku dhamaystirtay hadalkii iyadoo xishoonaysa.

"Haa ina keen anigaa xagooda u socdee" ayaa inantii ugu jawaabtay, wayna dabagashay iyadoon weedh kale o dhan.

Markay inyar socdeen ayay gabadhii ku soo jeesatay, iyadoo istaagaysa kuna tidhi: "Wala le isug darawalkaa ayaan kuu soo waydiin isaga ayaa u baxaya meesha aad doonaysee".

"Waad mahad santahay 100%."ayay ku celisay, waxayna isku sii mashquulisay daawasho ku xeernayd agagaarkeeda. in yar kadibna waxay maqashay cod leh "Abaayo,..."

"Haa ayay iyadoo soo jeesanaysa tiri;

"waan ka xumahay wuu buuxsamay gaarigaan, mid kale oo taagana maleh bari kasakow sida darawalku ii sheegay, wiilkaa e aan lahadlaayay wuxuu ahaa darawalkeenii, aniguna intii tabartayda ahayd waan kuugu dadaalay sidaad boos uga heli lahayd, waase ii suurtoobi wayday.

"Waxba ma aha waadna i sharaftee allaha ku sharfo", ayay iyana hadal ku goysay.

"Makii baan gurigiisa ku la ban karaa ayay hoos iskala guryantay,

Yaah ayaa tii kale lasoo booday, iyadoo xam-xam dareentay.

"maya waxba ma aha ayay ku qancisay.

"ma xaafadii baad u noqonaysaa?"

"Intaan xamar joogi lahaa waxaan caawa jeclaan lahaan inaan xataa meel kabaxsan sii seexdo".



inyar ayay kala aamuseen, tiii barta yarayd baa midii kale ee cunugga xanbaarsanayd ku tiri "Abaayo magacaa?"Xaawo cabdi adigana? ayay ku celisay. Mako Salaad baa la iigu yeeraa. Bal kawaran hadadda e sidaa u deg degsan tahay aadna raacdo aniga iyo ninkayga?" "Way ii haboonaan lahayd laakiin armaan duqaagu raali kanoqon"ayay ugu dul martay. Mako intay qososhay ayay tiri " ina kexee aan ku gaarnee intaanu dhaqaaqin" Hoosta intay Alxamdu liihi kagurtay ayay daba gashay iyadoon garanaynin waxay ku celiso.

waxay gurigii soo gaareen iyagoon is dhaafsan waxaan kabadnayn ilmaha dhabarka u saaran iyo noocoo yahay gabar iyo wiil

Meel horteeda ah waxaa taagnaa landrover uu goofanahiisu furaa nin joog iyo jamaal lehna gudihiisa eegayo, gaarigii e ayuu daboolay isagoon ogayn in ladhinac joogo, dhaqaaq ayuu is yiri mise xaaskiisii ayaaba hortaagan oo ay lasocoto gabar xanbaarsan cunug, oo isaga ajnabi ku ah.

"Axmed aan ku baro gabadhaan"ayay tiri makko iyadoo farta ku fiiqaysa marwadii la sinayd (waxaa layiraahdaa Xaawo Cabdi) raacisayna (saygayga xalaasha ah Axmed Muuse) (Barasho wanaagsan ayuu ku yiri, barasho wanaagsan ayay iyana ku celisay.

Mako ayuu xaaskiisii ugu yeeray una soo jeestay Xaawo isagoo kuleh "naga - raali ahaw(waxba ma aha). Maka ayuu

kubilaabay kolkuu dhinaca ula soo baxay k kadib "kolkaad iga tagtay ayaa la ii soo sheegay inuu wiilkii ina adeerkay ahaa uu geeriyooday xalay"!ö "Makii xanuunsanaa oo aynu ku soconay?" "ayay si mug leh u su'aashay,"haa waa jaamac Maxamuud". "Alaha u naxariisto ayay iyadoo naxsan tiri aamusnaan yar kadibna waxay raacisay "inantaa ila socotaa waxay iyana doonaysaa inay gaarto balad weyne,waana qof murugaysan sida ka muuqata;waxaana jeclaystay inay ina raacdo maadaama aan koley aadayno halkaa,baabuurkii tagayayna wuu kabuuxsanay". "In laysu gargaaro waa waajib "ayuu ku xoojiyay fiktadeedii inyar kadibna axmed wuxuu u dhaqaaqay xagii dlbaabkii guriga si uu ula dardaarmo ilaaliyihii aqalka, nakana dhankii xaawo ayay soo aaday una sheegtay in haday diyaartahay ay fuuli karaan baabuurka,waqti yar kadib baana axmed ku soo fariistay kursigii laga hogaaminaaay gaariga dhinaca midig waxaa ka xigtay xaaskiisii,iyadana waxaa midigta ka ahaa Xaawo oo wiilkeedee dhabta u saaran yahay

Koontaroolka xamar intaanay kabixin ayuu axmed baabuurkii afka u galiyay geed hoostii,lana socodsiiyay inay haboontahay inay jiscin kasii qaataan halkaa,isgaana usoo adeegay,xaawo iyo nako waxay u qadeeyeen wada jir axmedna baarka ayuu kasoo q qadeeyay. Ilaahay markay ku shugriyeen ayay ku soo laabteen landaroverkoodii sidii hore oo kalana u fariisteen,cabaar markay



kaftameen ayaa axmed weydiiyey"xaawo yaad ugu socotaa beled weyne?"

"walaale hoyadey oo xanuunsan"ayey ku jawaabtay iyadoo ilka caddeynaysa.

"oo haddey hooyadaa jirran tahay maxaad inanka yar usoo kaxaysay?"

"cid aan uga tago ayaan waayey"

"maxaa dhacay aabihii miyaanu joogin? sidii dadkoo dhami iyadoo kale yihiin ayey u su,aashay.

"waa xaadir runtii laakiin..."hakad yar kaddib ayey maxkaxdeedu goosatay in ay haboon tahay in daacadnimo la isugu xogwaramo, waxayna raacisay"saakay ayaanu soo kala tagnay aniga iyo isagu"

"waanu ka xunnahay"ayey hal mar wada yidhaahdeen.aamusnaan yar kaddib ayuu axmed weydiiyey sababta keentay kala taggaas isagoo ogaa in su,aalaha noocaas oo kale ahi ay qalad yihiin,laakiin iska jecleystay inuu eego waxa ku qasbay furriinka ninka helay gabadhaan dabeecad wanaagga ilaahay ugu deeqay iyo weliba iyadoo ilmo u haysa.

"axmed ayey ku billowday hadalkii"ayey ku billowday hadalkii"runtii waxaa go,ay calaf intii aynu isku lahayn,kal guurkeenana sheydaan ka sokow waa mid uu isaga sabab u yahay,taasooahayd.."

"u kaadi aan kaa dhex galee"ayey malka kaga dhex gashay hadalkii,iyadoo kor u soo qaadaeysa inankii yaraa ee xaawo dhabta u

saarnaa."armuu kugu kaadshaa?"ayey iyana tidhi iyadoo u fasaxaysa in ay qabato."waxba maaha xitaa haddu igusii daayo,ee iska wado sheekadaada"ayey ku adkaysay.

"waa yahay waxaan ninkayga iyo anigu aqal galnay laba sano ka hor isagoo iga soo kaxaystay hooyadey,markii la i siiyey kaddib waxaan kula noolaa beled weyne sida dhaqankeenu uu qabo,shaqadiisu waxay ahayd shufiriimo lacagta uu ka helaayeyna waxa ay ahayd mid si wanaagsan inoogu fillan markaanu sanad isla joognay ayaa waxaa noo dhashay wiilkan,oo aanu ugu magax darnay xasan yare,waxaan ka xumahay in aan inankayga magaciisa hore idiinkugu sheegin"

"macna ma laha ee iska wado"ayaa axmed yiri isagoo dareenkiisa inta badan u soo jeedinaaya sheekada.

"waxaanu ku nooleyn farxad intii qoys u baahnaa,laakiin habeen hantan laga joogo sedex bilood ayuu ii sheegay in uu jeel yahay in uu naag kale guursado,waxaana aan la socod siiyey in haddii uu awood u leeyahay in uu isku dhaqo laba reer uu fasaxan yahay,farxad darteed buu ii ballan qaaday waxaan qof tabartiisa ahayn inuu mid kale siiyo,intaanu falkii ku dhaqaaqin ayuu la tashaday saaxiibadii waxayna u wada sheegeen in ayan haboonayn marxaladda uu ku jiro inuu ku yeesho laba xaas,wuuse ku gacan seydhay,bil kaddibna wuxuu ila socodsiiyey



inuu soo mehersday gabadhii anna hambalyo ayaan ku idhi,balse wixii habeenkaa uu inanta soo nikaaxsaday waxaa ka go,day kaddib kalsoonidii uu inagula noolaa aniga iyo wiilkaan yar,nin saaxiibadii ka mid ah ayaa ii soo sheegay in xaaska yari ku qasbayo in uu i furo aniga,waxbase uma qaadan arintaa inkastoon ka kululaaday markii la ii soo tebiyey.

anigoo aamusnaan isaga samraaya ayuu iigu bushaareeyey in aynaan nolo dambe la wadaagaynin,markaan u sheegay inuusan degdegin wuxuu iigu jawaabay inuusan dooneyn hadal badan dhararaayana inta uu waagu ka beryaaya,kolkuu caddaadayna ilaahay waa noo soo kala fududeeyey".

"maadaama aad darawal ku tilmaantay ninkaagii waxaa laga yaabaa in aan aqoonsaday ee ma ii sheegi kartaa magaciisa?" ayuu axmad su,aalay kaddin markii uu cabbaar aamusnaa isagoo eegaya wejigeeda.

"magaciisaa"ayey tiri iyadoo eegaysa horteeda,"alla baabuurka!!!"ayey ku qaylisay islamarkiiba,dhaqso ayuu ku jeestay mise gaari weyn ayuuba hoosta ka geli rabaa, xaawa labadeedii gancood oo is dhaafsan ayey wejiga isaga aadisay naxdin aawadeed,sidii in ay qoorta inta ka serreysa ka difaaceyso dhaqgax lagu soo tuuray,makana wiilkii yaraa ee ay dhabta ku haysay ayey ku adkaysay intii u dhaxaysay labadeedii garbood,axmed baabuurkii isteerinkiisa ayuu

midg u soo gooyey kana baxay wadadii oo dhan,xawaarihii uu ku socday iyorafka uu soo dhexgalayba ayaa markii uu is yiri ku soo celi laamiga,waxaa furmay albaabkii iyo dhanka xaawo,iyagoon ogeyn bayna ka faniintay gaarigii,islamarkiiba waxaa jug xoog leh gaarsiieyy qaybtii dambe ee baabuurka.

Kolkii uu hubsaday gaarigii in uu dariiqa ku soo noqday,ayuu dib eegaymiso kay ka sigteen maba hakin xawaarihii uu ku socdayy,albaabka inta uu furay ayuu soo booday isagooabbaaraya halkii uu is lahaa xaawo wey ku dhici kartaa,isagoo aad mooddo hawtulhamag oo kale makaha iyadoo naxsan inankii yaraana naasaha dhexdooda ku adkaynaysa ayey tartiib uga soo daadagtay gaarigii.

Afarta jiho ayuu marba mid u cararay waxna arki waayey,meel inyar u jirta ayey uga muuqatay iyadoo taahaysa,ugu dambeyntiiinuu soo gurguurtay inuu soo booday inuu soo talaabsaday iyo in kale ayuu jilbihiisii saaray qaarkeedii hore oo dhaawac muuqda ku yiilay,foolka hore ayaa dillaacay.

"illinka gaariga iga fur"ayuu ugu dhawaaqay xaaskiisii oo markaas soo dhinac kadaloobsaneysay.kor ayey u booday intaysan tillaabba qaadin baase xaawo tiri"axmed ah... ah...u kaadi"iyadoo uu codkeedu daciif yahay ,maka fadhigii ayey ku laabatay iyadoo fiigtaalsan.

"haye..hee"ayuu si dabassan u yiri.



"waxbana ha iga welaelin wax waliba...aah.. waa qoran yihiin,umana ah ah ..."wayn hakatay si ay neef u qaadato indhahana isku qabatay,axmed kolkii uu codkeedu soo gaari waayey ayuu u qaatay in ay baxday"umana maleynayo in aan nabol lu soo waarayo"ayey haddana ku billowday,laakiin waxaan idinka codsanayaa in aad wiilkaa yar korsataan ka mid dhigtaan ilmihiina oo kale".

"waa wacad"ayey hal mar ka wada yiraaheen iyagoo is leh ka wada gaarsiiya,"waayo" ayey markii ay cabbaar aamusnayd tiri"hooyadey cambaro xayle waa waayeel,waana jirrooley runtiina aan awood u lahayn,aabihiina inkasta oo...ah...aanu waxba tareyn haddana ...aah...ah...magaciisa waxaa...aah;;;eh.. "....aah..."intay dhameystiri lahayd ayey xoojisatay jiritaanka ilaaha waaxidka ah iyo rasuulkiisa maxamed ah"N.N.N.K"axmedna yaasiinka ayuu afka ku boobay markuu aqrinayey aayaddii ugu dambeysay ayey qoorteedii dhinac u dhacday!!!

"ma baxday"ayag maka weydiisay iaydoo aamin sanayd in ay geeriyootay."allaha u naxariisto"ayuu ugu jawaabay isagoo isku toosinaaya meydkii,"go cad ii soo qabo ayuu ku amray xaaskiisa".

Iyadoo barooraneysa inankii ranaana uu korkeeda ka cabaadayo ayey u keentay,isna intuu qaaday ayuu jiirigaan uu biyo ku dity uga mayray xargaggii dhiiga kuna daaharay jirkeedii dhamaa maradii,wuxuuna maka u

sheegay in ay is.adkayso,wiilkana ogaato, naf kastana dhimashadu ay waajib ku tahay. siday isaga soo gurguuranayeen ayey habeenimadii afarta saac soo galeen balad weyne, daqiiqado kaddibna wuxuu soo gaaray gurigii tacsidu taalay ee adeerkiis,shanqartii gaariga markii la maqlay ayaa bannaanka la isasoo tubay meel aan wax saas ah u jirin,dadka taagnaana waxaa ku jiray adeerkiis.albaabkii ayuu iska furay kana degay gaarigii wuxuunaku cararay adeerkii,haddana istaagay markii uu in yar u jirsaday.

"maxaa kugu dhacay axmed?"ayuu adeerkii wediiyey,jawaabtiisana waxay noqotay in uu farta ku fiiqo xaggii laandaroofarka sidii niin hadalkaba ka lumay.madaxyadoodii ayey u jeediyeen halkii uu tilmaamay,waxay arkeen, maka oo wiil yar xambaarsan kana soo daadagaysa baabuurkii,markey cagaha dhulka saartay ayaa lugaheedii awoodi waayeen in ay xoojiyaan,islamarkiina waxay ku dhacday dhulka iyadoo weli sidiisii u haysa wiilkii yaraa.

Hal mar baa lagu yaacay qof soo gaaraana axmad baa ugu horeeyey,wuxuuna la boobay xasan yare oo oohin ku maqnaa,makana inta la qaaday ayaa la geeyey aqal soomaali ay labo dumar ahi ku jireen,inankii yaraana markii la aamusiyey waxaa la dhinac seexiyey maka,intaa kaddibna axmed wuxuu ku soo laabatay dibadda.

"adeer eddee bay wax u sheceen?maxaa



helay maka?wiilkana ma adaa..."ayuu haddana su,aalay intuusan dhammeyn baase axmed ka dhex galay"gaariga dabadiisa meyd baa saaran!!!"ayuu yidhi isagoon aan hubin wixii uu sheegay,isagoo weliba garab la, wixii uu ku hadli lahaa.

"yaah"ayey hal mar ku dhawaaqeen odayadii dhinac taagnaa,madaxa buu ruxay isagoo tilmaamaya haa,adeerkiisna wuxuu u dhaqaaqay dhinicii gaariga si uu u soo hubiyo,isaga oo afka gacanta ku haya ayuu ka soo noqday gaarigii,afar oday ayuuna u diray in ay meydka soo dejiyaan,intii soo hartay iyo axmadna u sheegay in ay fariistaan gogol aan markaa ka dheereyn.

3"maandhow bal nooga waran sida ay arintu ku dhacday"ayaa maxamuud si deggan u weydiiyey wiilkiisii kaddib kolkii ragga dhami saani salka u wada saareen gogosha.

Axmed intuu is qaabeeyey codkana sifaystay ayuu ugu sheekeeyey qisadii soo martay intii uu jidka ku soo jiray gunteedii illaa iyo gunaanadkeedii,markii uu sii dhameynayey ayuu wuxuu su,aalay "adeer ma jiraa mase taqaannaa sambaro xayle oo la iigu soo tilmaamay halkan?"

"alla!!ma cabbaro gabadheedii bay ahayd qofka aad ka hadleysay?"ayaa islaan dulcedka kala socotay sheekada kaga soo yeertay.

"haa eedo ma garaneysaa?"ayaa axmed kuu celiyey iyagoo wada eegaya dukdii.

"si fiican ayaan u aqaan"ayey tiri hakad yar dabadiina raacisay"sakaraad bay ruuxeedu ahayd markaan saakay ka soo tagayey,gabadhuna haddii ay xaaw tahay ehel aan habartaa ahayn malaha,waayo aabaheeda iyadoo laba jir ah ayuu geeriyooday hooyadeedna dib dambe uma guursan"

Madaxa ayey hoos u wada laadlaadiyeen iyagoo ka xun dhibaatada reerka haysata ama ku habsatay.aamusnaan yar kaddibna waxaa la go,aansaday in shan nin oo axmed iyo adeerkiis ku jiraan ay soo eegaan dugda jiran,ugu dambeyntiina wey yimaadeen iyagoo ay hogaamineyso islaantii u sheegtay in ay garaneyso,habartii oo taahaysa ayeyna u soo galeen,wax u sheeg iska daaye axay gogoshoodii ku soo laabteen iyagoo la yaaban in ay naf la gaari doonto aroorta berrito ah iyo in kale,in yar kaddibna waxaa la magacaabay wadaadadii dhaqi lahaameedka uu axmed keenay.

Subaxnimadii hore ayey isku diyaariyeen qabrigii "xabaalihii"si ay usoo aasaan inantii lix iyo tobanka saacadood mootanayd intayan dhaqaaqin baase loo soo sheegay in ay geeriyootay gabadha ay sidaan hooyadeed, meydkeeduna uu diyaar u yahay xabaal,taasoo uu micnaheedu yahay in la dhaqay karfanna lagu riday.

Waxay isu qaybiyeen laba qaybood,qaarna waxay aadeen islaantii dhimatay xalay sagaalka saac,intii kalana waxay ku hartay gabadhii,waxayna isugu yimaadeen qabrigii"xabaalihii,markii janaaso lagu tukadayna waxaa



lagu kala aasay laba qabri oo deris ka ah dhinac kasta.

Kolkii laga soo noqday waxaa la goostay in tacsidii ay labadii hadda ka soo tageen iyo wiilkii hore u baxayba laga dhigo todobaad.

Todobaadkaas kaddib xamed,xaaskiisii iyo wiilkii yaraa oo aan ehelka iyaga ahayni lahayn waxay sii joogeen belad weyne sedex cisho subixii dambana waxay usoo jihaysteen xamar.

CUTUBKA LABAAD

Kolkii uu arkay axmed in shilkii,xaaskiisu uu aad wax ugu dhimay,ayuu xasan yare u soo kexeeyey inan yar oo isaga oo kaliya xanaaneysa,wuxuuna siiyey qol yar,wax alla waxay u baahnaan karayeenna diyaar uga soo dhigay.

Xaaladda maka waqtiba waqtiga ka dambeeya way kasoo xumaanaysay,habeenkii calwasaad iyo qaylo saqda dhexe ah ayey lahayd,seddex bilood ayeyna saas ku sugnayd,iyadoo habeenba habeenka ka dambeeya la filaayey in ay ka soo wahaagsanaaneyso,iyadoo weliba taqtar lala kaashanayey.

Axmed oo dhinac jiifa ayey habeen soo baraarugtay,iyadoo uu taqtarku habeenkaas ku sheegay wanaag,rajo weynna laga qabay in ay saani u seexato.

"maxaa ku helay ayuu"waydiiyey ninkeedii,isagoo garabka ka taabanaya.

"waa taa!"ayey ku qaylisay iaydoo farta ku fiiqaysa meel aan la arkayn.

"waa tuma"ayuu su,aalay,iasoo eegaya halkii ay tilmaantay,waxbana u jeedi waayey.

"ma anigaa dilay"ayey waydiisay iyadoo ilmaynaysa wejigana wejiga u saareysa duqeedii.

Waxay ahayd muddadii ugu horeysay oo intii ay jiranayd seddex weedh ay tirandhe, aad buuna ugu farxay.

"maya ee ilaah anarkiis bay ku geeriyootay"ayuu ugu jawaabay isagoo fahansan halka ay ka hadleysay,jiifka in uu ku celiyana damcay.

"laakin walaal axmed in aan anigu soo kexeeyey ma og tahay,ee aan sabab ugu hay sidaas"ayey xusuusisay iyadoo sii jiifanaysa.

"gacaliso wax waliba oo dhacaa way qoran yihiin"ayuu u sheegay kaddibna su,aalay"adigu ma waxaad u soo waday in aad wanaag u sameyso mise in aad dibindaabyeyso?"

"in aan isaan u falo ayey la soo boodey.

"waxaad ka welweli haddaba ilaahay wuxuu daalacdaa quluubta bani,aadamka,adiga kaaga in aad xumaan sameyso kuna ayana jirin"kuwaas iyo kuwo kale oo raxmad leh ayuu axmed ku tusaaleeyey xaaskiisii,in ayan waxba ku lahayn geerida xaawo,habeenkaasna waxay mako seexatay iyadoo dareemaysa inuu



culeys weyn oo harbaheeda saarnaa ka degay. waagii inta uusan soo beryin bay ka kacday iyadoon cid kale hurdada ka arbushin ayey aaday suuliga.markay soo meyratay oo ay ku soo noqotay qolkeedii ayey albaabka ka sokeeya ka maqashay oohin ilmeed.way garaacday waxaana ka furay gabadhii yareyd ee shaqaalaha looga dhigay wiilka.

"yaa ahayd adigu"bay maka waydiisay inantii"waxaan ahay gabadh loo keenay in ay xanaaneyso inankaas yar ee halkaas jiifa"ayey ku jawaabtay iyadoo tilmaamaysa sariirtii yareyd ee uu xasan are ku jiifay.

Hore ayey u gudubtay iyadoo aan hadal kale odhan,dhabtana saartay wiilkii yaraa. axmed kolkii uu ka waayey xaaskiis i halkii ay huruday ayuu soo cararay si uu ufa baadi goobo aqalka intiisa kale iyo dibaddiisaba.markuu albaabka kasoo baxay ayuu codkeedii ka maqlay illinkii ku dheganaa,irridii buuna soo istaagay.waa mahad alla waaba haka oo bootbootinaysa xasan ayro ayuu caloosha iska yidhi,wuxuuna usoo dhaqaaqay xaggeedii.

"ma is aqoonsateen gabadha hortaada taagan?"ayuu su,aalay isagoo aad ugu faraxsan caafimaadka degdegga ah ee uu ilaahay u keenay.

"maya "ayey si gaaban ugu jawaabtay.

"kolay iyadu way ku garaneysaa laakiin waxaa loogu yeedhaa xaliimo,seddexdii bilood ee tagtay ayey mas,uul ka ahayd xasan yare"

"barasho wanaagsan"ayey is yiraahdeen.

"laakiin"ayey tidhi maka aydoo kor u eegaysa ninkeeda"waxaan jeclahay in maanta wixii ka dambeeya aan anigu xasan yaro ha-yo,ogaadana?"

"maka,ma..."

"taas waa go,aan aan hadda gaaray,wa-ana aan isku filanahay,xaliimo shaqada gu-riga intiisa kale ha qabato"waana la isku raacay gabadhii yareydna aad bay ugu fara-xday figraddaas,waxayna guriga shaqadiisa iyo xanaaneynta xasan yaro in badan jecla-yd tan aqalaka.

Muddo dhowr iyo toban cisho ah ayuu intixaamayey in ay isku filan tahay iyo in kale,isagoo doonayey in uu u baxo baadiya-ha si uu usoo iibsado xoolo uu walaalkiis u haysy,si uu ugu sheegana la,aa laakiin uu sugayey in ay noqoto qof uu guri kaga tago karo.habeenkii dambe ayuu la socodsi-iyey.

"goormaad ambabaxaysaa"ayey si mug leh u weydiisay.raali kuma ahayn in uu tago,la-akiin in ay wajib ku ahayd in uu tago way ogeyd.

"seddex cisho kaddib"ayuu ugu jawaab-ay.

"haddaad xoolaha iibiso maxaad doone-ysaa in aad sameyso?"

"waxaan ku han weynahay in aan dukaan wayn xamar ka furo"ayuu figraddiisii ugu sheegay;



"waa arin wanaagsan"ayey ku raacday.

Maalintii baa la gaaray waxayna labad-oodubа hurdada katooseen waqtigii caadada u ahayd.markii salaadda subax soo tukaday ay-uu xaas kiisiи u sheegay in ay usii diyaar-iso alaabtii uu qaadan lahaa inta uu ku ma-qan yahy garaashka.

Waxay soo dul istaagtay armaajadii dh-arka iaydoo daremaysa daal iyo madax xanun. boorsadii ay alaabta ku ridi lahayd ayey s-aartay sariirta dusheeda.kolkii ay go,ii ugu horeeyey laalaabtay oo ay ku rid is tiri ayaa waxaa halmar la wareegatay saqafkii sare iyo dhulkii hoose ee guriga!

Awoodii ay isku haysay ayaa ka luntay, wixii ka horeeyeyna arki wayday.sare joogga ayey ka dhacday,jugtii ka yeertayna waxaa maqlay xaliima oo ku cadayaneysay illinka e-weyn hortiisa.orod ayey ku timid halkii ay shanqartu ku tuhmaysay,waxayna aragtay maka oo dhabarka u dhacsan madaxuna uu dhiigayo.

"alla alla"bay ku qaylisay,iyadoo moo-daysa in ayaan dhawaaqin.waxaa soo yaacay deriskii oo dhan,xasan yarena wuxuu ka sah) alay hurdadii,daqiiqad gudaheed ayaa dadkii u dhowaa soo buuxiyey aqalkii ay maka ku ji-rtay.

Waxaa soo yeedhay guuxii gaadhigii ax-med,xaliimana markuu dhegaheeda ku dhacay ayey dhex jibaaxday dadkii,ugana hor tagtay albaabkii iskuna tuurtay iyadoo booyeysa.

Isagoo la yaaban iyadda ayaa ahddana waxaa mucjiso geliyey sida gurigiisa loo dhoobanyahay.hadal isagoon odhan ayuu soo abbaaray qolkiisii,goortu madaxa soo hel-iyey ayuu arkay xaaskiisii oo dhinac taal miyirna aan lahayn.kor intuu u qaaday ayuu ula cararay xaggii baabuurka"inanka yar iyo guriga ogow"ayuu kula dardaarmay xaliimai isagoo orod ku dhafaya.

Wuxuu keenay isbitaal martiina kana gaarsiiyey qaybta gargaarka degdegga ah. saacad kaddib bay kala qaaday indhihii waxayna aragtay ninkeedii iyo taqtar hortaagan.

"sidee tahay"ayaa taqtarkii "su,aalay. isagoo madaxa ka saaraya gacanta halkii ay fa sheddu ku duubnayd.

"waan ladanahay"ayey si gaaban ugu jawaabtay,i adoo hareeraheeda eegaysa lana yaaban halka ay joogto.

"sidii ay wax u dheceen ma noo sheegi kartaa?"baa taqtarkii haddana si deggan u weydiiyey.

Intay dhabarka ku tiirsatay sariirtii madaxeedii bay si tafatiran uaga sheekeysay qisadii"wixii"qabsaday.

"taqtar ma jiraan wax aad is leedahay way sababi karaan wareerkaas?"ayaa axmed markii ugu horeysay ku hadlay.

"waxyaabo fara badan ayaa keeni kara" ayuu ku qanciyey"laakiin in aan baaris ku hubsanno ayaa ha



boon"

Markuu ka qa day dhammaan baaristii loo baahnaa ayaa taqtarkii u sheegay axmed in uu soo doono natiijada maalinta xigtay; waqtigii la balamiyey ayuu yimidaxmed.cabsida uu ka qabay jawaabata waxaad ka garaneysyay wajigiisa oo welwelka ka muuqday u ekaa sida mid ka qof kii uu adduunyada ugu jeclaa uu geeriyoday.isagoo is dhiirinaya gaataxadana afka ku haya ayuu soo galay xafiiskii taqtarka,taqtarkiina goortuu arkay axmad oo soo dhaafaya albaabka ayuu sara joogsday si uu u gacan qaado. "asalaamacaleykum "ayuu ku bariidiyey.

"wacaleykum salaam waraxmatu llaahi wabarakaatuhu"ayuu isaguna ku celiyey.

Axmed oo istaagga isku cellin kari la, ayaa ku fariistay kursigii loogu tala gal-ay booqatada,taqtarkiina intuu qaanaddiisa furay ayuu ka soo saaray fayl ay ku jireen warqado fara badan.

"sow maka ma ahayn magaca xaaskaaga" ayuu weydiiyey isagoo daaraya galkii miiska dushiisa.

"haa"ayuu ku jawaabayisagoo aad mood-deyso in uu roob ku da,ayo,dhidid ka socda dartii.

"wax dhib ah oo ku soo baxay malaha" ayuu yiri taqtarkii isagoo hubinaya warqadihii natiijada"waxaana aan kuugu hambalyeynayaa in ay leedahay uur seddex bilood ah.

"yaah"ayuu yiriisagoo qaylinaaya,ruma-
ynna la, waxa taqtarku uu u sheegayo.

"waa dhab"ayuu ugu sheekeeyey"siidaan
jaawaabta ka arkay"

Ugu dambeyntii wuu ku qancay soona qa-
atay jawaabtii iyo warqad uu taqtarku daawo
ugu soo qoray,farmashiyihii ugu dhowaana ho-
ray uga soo gaday.wuxuu gurugii ku soo noq-
day isagoon si aan xisaab lahayn ka duwan si-
dii uu ku baxay.

"aaway naka "ayuu ku qayliyey isagoon
soo gaaring qolkii ay ku jirtay.waxay ka soo
sara kaday jiifkii iyadoo yaaban.isagoonh
hakan ayuu ku booday kolkii uu albaabka ka-
soo galay,sidii dhallaankiina kor u qaaday.

"waw...waw...bes"ayey ku dhawaaqday.
tartiib ayuu ugu soo celiyey halkii uu ka
dafay isagoo ka taxadaraaya in ay iska kor
dhacaan.

"naxaa soo kordhay"ayeyy waydiisay iy-
adoo neef tuuraysa sidii iyadoo muddo soo
ordaysay.

"in aad lamaanan tahay"ayuu si gaaban
oo otomaatik ah ku celiyey.

"alxamdu lillaahi" ayey tiri"ilaahay
ducadeydii waa iga aqbalay".

"qayr allaha ka dhigo "ayuu kaga dhin-
duceeyey.

"aamiin inyii muslin a ba waxa ay sug-
ayaan alaha qayr uga dhigo"

"aamiin"ayuu ku celiyey.

Iyagoo wada aamusan garan la,na waxa



ay ka hadleen ayey waxay maqleen qosolka xa-
san yare oo ku dhex jira sariirtiisii yare-
yd.isla goortii ay eegeen halkii uu ka qos-
laayey ayey waxay arkeen inankii yaraa oo
fahdiya sariirtiisa bartamaheeda kuna soo
jeeda iyaga isagoo qoslaya,gacmihiisuuna ko-
rba u taagay sidii inuu ogaa farxaddooda oo
uu ilaah u mahad noqaayo.wuxuu tusay xaask-
iisii qosol bayna la dhaceen.intay istaagt-
ay ayey soo qabatay inankii yaraa kuna soo
noqotay halkii ay ka kacday.

"goormaad ka dhiganeysaa bixitaankaagii"
bay su,aashay iyadoo gabankii yaraa dhabta
ku haysaa madaxa u salaaxaysa.

"ma garanaayo"buu ku jawaabay.weli ma
uusan goosan waqtigii uu ka dhigan lahaa.

"berrit ole ka waran"

"sow ma dhowa?"

"way haboon tahay in shaqada ku sugay-
sa aad iska dedejiso"ayey ku tusaaleysay.

"waa hagaag "ayuu ku raacay.

"imisa ayaad u maleyneysaa in aad ma-
qnaaneyso?"ayey weydiisay aamusnaan yar ka-
ddib.

"toddobaad haddii uu eebe idmo"ayuu ku
jawaabay. intaa wixii ka dambeeyey wuxuu si
wanaagsan ugala dardaarmay nafteeda oo ah
tan keliya ee uu adduunyada ka fiirsanaayo
iyo xasan yare oo aan qof kale ka dhrsugeyn

Subaxnimadii ayuu isku xirtay alaabti-
isa,maca salaameeyeyna xaaskiisii,xaliimo
waardiyaha guriga iyio xsan yareba.

gacmaha ayey usii haatiyeen iyagoo ilaah ka rajeynaya inuu ku samo keeno,xasan yar-ena uusan baabuurkii axmed waday indhaha ka qaadin illaa uu ka mirqaayey sidii nin wax garabaaya oo kale.

Afar maalin kaddin ayuu soo laabtay isagoo soo dhameystay hawshii uu u baxay.

Waxay ahayd casar maka iyo wiilkeedii yaraana wxay ku raaxaysanayeen qolkeedii. goortii uu illinkii weyhaa soo istaagay x ayaa xaliimo aragtay.

"alla waa axmed"ayey ku qaylisay.makana waay aqbaartaas ka maqashay qolkii ay ku jirtay.

Markey isa salaameen kaddib ayaa waxa uu ka wareystay xaaskiisii iyo sidii ay xaladdoodu ahayd inti uu maqnaa.

"aad baynu u fiicnayn markii beenta la iska dhowro"ayey u sheegtay"laakiin adiga oo qura baanu u xiisnayaayey raacisay iyadoo ilka caddeynaysa.

Toolka intuu ka dhunkaday ayuu ku yiri "aniguba sidoo kale ayaan idiinkugu soo hiloobay"

"ujeedadii aad u baxday ilaahay ma ku-usoo fududeeyey?"

"haa alxamdu lilla hi"buu ku celiyey, una sheegay in uu xalay soo galay saakayna uu xoolihii gaday,isla habeenkii ayeyna go, aansadeen waxa ay ku qaban lahaayeen lacagtaas faraha badan,ka sokow dukaankii weynaa ee uu axmed ku haminaayey.waxay go,aan



ku gaareen in la gado lix boosoo hor leh, kana kala cabirtaan xaafadaha bilaaja carab,kaasabobolaare iyo boondheere,qowlkoodiina wey hirgeliyeen.

Dukaankii y fureen wuxuu muddo dhan bilood ah u cararayey sida ay ka filayeen si ka wanaagsan,ijkastoo uu xamed inta badan ku maqnaa safar,laakiin bishii lixaad oo ahayd bishii ugu dambeysay ee maka xxx wuxuu tirtiray dhammaan ballamadii uu ku toolmoonaa in uu fuliyo.

Iasagoo goob joog ah ayaa nasiib wanaag maka la qabtay,wuxuuna ula cararay isbitaal martiini.kolkii uu diiwaan galiyey kaddib ayaa ka soexiyey qolka mid ah mkuwii umulaynta.afarta jaho ayuu midba mar u dhaqaaqay isagoo ha ba kalkaalisadii ama taqtarkii ka soo baxa halkii xaaskiisii la geliyey ka wareysanaya sidii ay ahayd.

Ugu dambeyntii ayuu isku celiyey,wuxuuna soo xusuustay habeen kii ay adeerdadiis u soo jeediyeen in uu furo maka oo ay ku tilmaameen in ay tahay ma dhasho,muddo badanna uu qabay,ayna diyaar u yihiin in in ay ku daraan gabar ay iyagu isoo dooreen,wuxuuse ku qanciyey dhammaantood in in ay dhalliddu tahay mid xag alla ka timaadda loona baahan yahay in talada la saarto aana laga rajo dhigin marnaba,sinnana aan uga yeelayn in uu baabi,iyo farxadda uu ku nool yahay hadda,mid cusubna bilabo;

Intay maskaxdiisu soo noqotay ayuu keligiis iskula hadlay "degganaantu haboonaa degdeggu qasaare badanaa,hubsiimaduna haboonaa".

Waagii ayaa soo caddaaday isagoo weli meehsiidii fahdiya.taqtarkii ayaa soo baxay oo soo dul istaagay xamed oo aan ka war hayn.

3"sidee ahayd" ayuu la soo booday markuu taqtarkii arkay.

"xaaladdeedu way wanaagsan tahay waxaana idinku so biiray wiil"ayuu u sheegay raaciyeyna"waxaan idinka rajeynayaa in aad igu samisaan una bixisaan sa·lax"

"waa haga g "ayuu ku ballan qa day.

Laba ma lmood kaddibna naka iyo willkeedii waxaa la keenay guri eedii.sedex bil kaddibna waxay awoo d u yeelatay in ay dib u billowdo dhaqadeedii,sanad iyo bar kaddibna waxay dhasnay gabar,waxayna isku raacoon in mahaceeda laga dhigo fartuun.

CUTUBKA SEDEXAAD

Isbitaal laan saleeti illinkiisa waxaa ka soo baxay nin caato ah,garbo ballaaranna leh,wuxuuna isku giijinaayey ul baakoorad ah,soona abbaaray halkii laga raacaayey dhanka baabuueta aad da gobolada waqooyi,halkaasi oo uu ku halleynayey saaxiibkii cumar madoobe oo ay si wada jir ah ugu dhaqaqeyn jireen axmed muuse walow uusan hubin in uu safar ku maqnaa iyo inkale



waxaa ugu dambeyn todobaad ka hor in kasta oo uu u sheegy waqtiga uu filaayey in uu bannaan ka yimaado. isagoo ku jiray cusbitaalka muddo seddex sanadood ah kaddib markii uu la galay shil aad u xulus gaarigi sayroonka ahaa ee uu watay kana shaqaynaayey dhanka gobolada koofureed.nasiib wanaag waa xaadir ninkii uu raadinaayey,wuxuuna raraayey gaarigii uu waday oo waaba ambabaxaayey.

"cumar" ayuu meel in ayr u jirta uga soo dhawaaqay.cumar waa uu soo jeestay isagoo codka uu maqlay ju tuhmay saaxiibkii cali mire,illa markiiba waaba uu soo xusuustay inuu isbitaalka kasoo baxaayey.

"ahlan wa sahlan.ilaahay ma kusoo nabad saray"ayuu cumar ku bariidiyey saaxiibkii cali.

"alxamdu lilla h"ayuu ku celiyey.cumar kolkii uu wareystay caafimaadka saxiibkii kaddib ayuu usoo kexeeyey maqaayad u dhoweyd boos teejada,una dalbay quraac wanaagsan.

"caliyow,horta xaggeed ku socotay oo uu hamigaagu ahaa"ayuu cumar weydiiey saaxiibkii intii ay quraacda u fadhiyeen?raashinkii oo gacanta ku hayey afkana u waday ayuu ka soo celiyey,madaxana kor u soo qaaday.

"cumarow xog ogaal ayaa u tahay arinkayga maantana sida aad la socoto ma jirto cid aan is leeyahay waad ku,hagaagi kartaa

xamar gudaheeda.sidaas daraadeed ayaan jeclahay in aan baadi goobo xaaskaygii hore iyo wiilkaygii yaraaba,taana aanan cid kale u eedsanoynij oo ay ku dhavday oo kaliya u hubsasho la,aantayda iyo degdegsiinyo li,ideyda....ayaa ....eh,waxaan jeclaa kolley u maleynaayo in aan soo helaayo in aan raadsho xaaskaygii hore oo aan runtii dambi weyn ka galay,si aan cafis u weydiiyo"

"xaggee bay jirtaa oo aad u u hagaageysaa?"ayaa cumar su,aalay isagoo ka xun dhiibka saaxiibkii haysta.

"hooyadey oo balad weyne deggan in ay la joogto waqtigan xaadirka ah ayaan u maleynayaa"

"goormaad tegeysaa ?ma maanta misc ?"

"nasasho iima taal,inta garbahaygu culeyskaas saaran yahay?"ayuu kaga dhex galay.

Baashinkii ayey laasteen kuna soo noqdeen gurigii,cumarna intuu baabuurkii shirkiisa fuulay ayuu wiil da,yar ka codsaday inuu gadaal ka raaco,una banneeyo booska nipda, ah oo xanuunsan,dhibaato xoog lehna sheegtay,wiilkiina wuu ka ogolaaday,calina shukaanta hore ayuu sidaas ku fuulay.

Waxay yimaadeen balad weyne fiidkii hore,intii ay jidka ku soo jireen ayaa cumar su,aalay saaxiibkii su,aal uu intii ay isbitaalka ku jireen kala baqay,taasoo ahayd sababta ku kalaftay inuu xaaskiisii furo,tii labaad,calina wuxuu u sheegay in markii uu shirka galay kaddib ay la socodsiisay in x



in aaney waqtigeeda ku luminayn sugiddiisa aan la hubin in uu caafimaadaayo iyo in kale,unabaahan tahay xaashida xuriyadda ka dhigaysa,isaguna wuu u fududeeyey waayo ma uusan lahayn awood uu kula doodo markaa.

Markii ay ka soo degeen gaarigii rakaabkiina ka soo degay ayaa cali saaxiibkii u sheegay inuu soo cegaayo halka uu ku tuhmaayey in ay deggan yihiin,saacad kaddibna usoo laaban doono hadduu soo helo iyo haddii kaleba.

Wuxuu soo abbaar y aqal soomaaligii uu ku ogaa xaaskiisa hooyadeed.waaba uu isku dunsan yahay qofkii caqli lehna wuu garan karaa inaan muddo sanafo ah madaxa la gelin.

Maskaxdiisii ayaa waxaa ku soo dhacday in kolkii ay xaawo ka soo tageysay hooyadeed xanuunsaneyd.

Tollow miyey geeriyootay duqdii?ayuuisasu,aalay.haddey dhimatayse xaawo xaggee bay qabatay?.

Aqalkii ayuu ku dul wareegay sidii illo yar oo kuunkuun dheelaaya,markuu daalayna wuxuu iska hor fariistay illinkiisii,sidii inuu sugaayo qofka kasoo baxaaya isagoo goradda iyo gunta is gashaday wuuba iska illoobay meesha cidladeedii iyo in la sugaayo.

3"cali"ayuu cumar madoobe oo sugi waayey ugu yeeray.

"xaawo"ayuu la soo booday isagoo istaagaya laakiin kolkii uu soo jeestay waxaa ka hor yimid saaxiibkii.

aad buu uga naxay cumar muuqaalka cali,garabka intuu kasoo qabtay ayuu usoo kaxeeyey halkii ay habeenkaas seexan lahaayeen.habeenkii oo idil ayuu dajinaayey una sheegayey in ayan shalaytadu haboonayn waxbana ka qaban karin wixii dhacay,iska samir wixii ku soo kordhana uu isagu la garab taagnaan doono,qol gooni ahna uu siin doono.calina firaddaas aad buu ugu farxay uguna mahad celiyey saaxiibkii maqribnimadii maalintii dambe ayey soo galeen xamar waxayna markii uu cumar gaarigii xirxiray garaashna ku soo hubsaday soo addeen gurigii ninkii ay u wada shaqayn jireen,axmed balse uu hadda cumar keli ku yahay kolkii ay soo gareen ayey garaaceen albaabkii waxaana ka furay waardiyihii salaan kaddibna wuxuu u sheegay in uu axmed gudaha ku jiro horayna,ay u galaan?.

Markey illinka soo dhaafeen ayey meel in yar u jirta ka arkeen axmed iyo xaaskiisii oo ciyaarsiinaya ilmahoodii.

"war hayo cumar "ayuu la soo booday xamedoo. oo xaaskiisii tustay in guriga lasoo galay.

"war nabade"ayuu ku celiyey"ninkan ma garaneysaa?"buuna u raaciyey.

"waaw"ayuu yiti axmed isla markii uu eegayna ku soo boodday isagoo leh"war ma cali miraa".

Axmed waa uu soo dhoweeyey martidii u timid fariisiyeyna meel munaasib ah.WUXUUNA durbadiiba wareysi ugu dhaqaaqay cali sida



xaalkiisu yahay cilina wuxuu u sheegay saaxiinkii in caafimaadkiisu wanaagsan yahay. laakiin uu taqtarku u sheegay in uu qabo wadna..xanuun,kana mannu cay qabashada shaqo culus oo dhan.intii ay is wareysanayeen cali waxay indhihiisu hayeen halkii ay ilmahu ku ciyaareen oo ah yd meel aan ka fogeyn fadhigooda ilaa ay se xisay mako.

Cali iyo saaxiibkii oo uu sii dhoweynaayo axmed ayaa ka soo wada baxay illinkii guriga wada jir ayey cali iyo cumar u gacan qaadeen axmed,inkastoo cali uu macasalaameeyey daal iyo caajis meel uu uaga yimidna aan la garan na saaran yahay.goortii ay ka soo tageen aqalkii axmed ayey waay si toos ah usoo aadeen hoygii cumar,waxayna soo gaarzen iyagoo wax hadal ah uu sn dhex marin intii ay wadada ku soo jireen islamarkii ay yimaadeehn baa cumar si degganaansho ah ugu diyaariyey saaxiibkii qolkii uu sac xan lahaa.

Markii uu soo mayrtay kaddib wuxuu cali mire soo galay halkii loo diyaariyey uguma horeyn dhibaaro,daal,madax xanuun murugo leh kolkii uu sariirta dhabarka saaray.

Waxaanahal mar maskaxdiisa ku soo dhacday intii qalad ah ee uu galay in tii uu doolaa.

Haddii aan hubsan lahaa tallaabo kasta oo aan qaaday caawa waxaan dhex jiifi lahaa qoys farxad  ku nool sida axmed

Ayuu cali isaga cataabay intii uu sariirta dul saarnaa.

CUTUBKA FARAAD

Kolkii uu saalax soogaaray sanadkii iskoolka ayaa isga iyo xaaskiisa la geeyey iskool waxayna noqdeen laba arday oo laysku tilmaamo,dhammaan dugsigii ay dhihanayeen kana soo dhex baxeen dhammaan ardaydii ay isku iskuulka ahaayeen,ha ahaato xag waxbarasho iyo xag aadaabba intii arday asluub leh lagu tilmaamo.axmed markii ay wiilashiisii fasalada hore ka baxeen ayuu u dhoofay dalka talyaaniga,wuxuuna kaso taabtay shan sano kaddib,labadii wiilna ay billaabeen fasalka koowaad ee dugsiga sare,fartuunna ay ku jirtay fasalka koowaad ee dugsiga dhexe

Axmed imaanshihiisa ayuu dhisay seddexdii boos ee dhinnayd,markaana wuxuu xaaskiisa usoo raray kaasa bobolaare,dukaankiina wuxuu ka dhigay mid aad u camiran,aadna u weyn marka la eego alaabta taal tiradooda.wuxuu xasan yare iyo saalax ka abaal mariyey dadaalkii dheeraadka ahaa ee ay sameeyeen muddadii uu maqnaa ,una sheegay haddii ay sidaas oo kale ku sii socdaan kagana gudbaan guul fasalka afaraad ee dugsiga sare uu siin doono abaal marin aan markaa cadadkeeda la sheegi karin.

SHan bil kaddin ayaa waxaa axmed warqad kaga timid shirkad talyaani ah oo ka



shaqaynaysay dalka sacuudiga una sheegtay in ay u hayeen booskii uu hore uga shaqaynaayey ee ahayd maamule.degdegna u soo galo.toban cisho kaddib wuxuu ka duulay garoonka gegida dayuuradaha isagoo si fiicanula dardaarmar xaaskiisa,wiilashiisiina ay ka ballan qaadeen imtixaanka kaddib.

Waxay sanad walba koowaad u ahaadaanba waxaa la soo gaaray fasalkii afaraad,fartuunna fasalka labaad ee dugsiga sare.

Habeen baa hooyadood u yeertay una sheegtay inuu aabahood soo diray warqad soona qabaaray nabad inuu ku nool yahay,jecel yahayna in uu yimaado intixaanka dugsiga kaddib.

"wiilashaydiiyow"bay ku soo gabagabaysay.waqtigii imtixaanka waa soo dhow yahay sidii aad la socotaanba,wixii horena waba maaha,waxaa la idinka doonayaa sanadkan in aad dadaal dheeraad ah sameysaan,si aad ugu gudubtaan?anoo og ayaan haddana idiinkugu yeeray caawa in aad iga ballan qaadaan intii tabartiina ah.

"hooyo waa balan"ayay la soo boodeen iyagoo garabka is haysta.subaxnimadii ayey xaliima la sicidsiiyeen in ay sooman yihiin oo ayan qado ugu tala gelin,quraacda ay u sameysayna ka caali ahaato.xaliimo waxay la yaabtay wiilasha waxa ku kallifay soon aan waqtigiisii la gaarrin iyadoo og in mid koodna an lagu lahayan maalin faral ah oo ka tagtay.waxay ugu timid maka duka an si ay ugu sheegto arintaan.

"eeddo waxaanu kuugu imid in aan kula socod siiyo in wiila shii ay saakay ii sheegeen in ay s oman yihiin iyadoo aan la joogin bishii ramadaan"ayey tiri xaliimo, iyadoo aad ka dareemayso codkeeda ilmo jacayl."eeddo haddadan la hadal gaajo ayey u dhimanayan waayo ma ayan sixuuran "ayey raacisay.

Haka intay carabka qabatay ayey tiri "xaliimo carab lo,aad cawo laguma waaniyo haddii ay sidaas go,aan ku gaareen anigaa su,aalaya sababta ee adigu u saaee afur wanaagsan waxbana haka walwalin" .

3"waa yahay,eeddo"intay tiri ayey isaga soo laabatay gurigii iyadoo ka naxsan weli wiila shii baahida ku baxay inkastoo ay niman waaweyn ahaayeen.

Kolkii ay iskoolkii ka timaadeen waxay isku xidheen qolkoodii ,qoraxdiina halkaas ayey ugu dhacday sidii ay waxu aqrinaayeen salaaddii maqrib ayey u boxeen,markey soo tukadeenna waxay soo abbaareen aqalkoodii ayagoo afuraaya ayaa hooyadood oo ay uga barteen in ay timaado markii ay dukaanka soo xirto soo dul istaagtay.

"hooyo"ayuu xasan la soo booday,maxaa soo kordhay weli waa maqribe?".

"waxba,waynu wada hadli doonnaa ee afura"ayey ku dejisay iyadoo usii gudbaysa qolkii fadhiga.

"hooyo waanakan"ayaa salax yiri iyagoo sii kala fariisanaaya laba kursi oo ka soo horjeeday halkiiayhooyadood ku fadhiday.-



"waxaan idinku imid in aan idin su,aalo sababta idinku kaliftay doonkan aan waqtigiisii la-gaarin.

Way is-eegeen iyagoo maskaxda iskala doodaaya inuu mid ba midka kale u daayo hadalka.ugu dambeyntii baa xasan yiri"hooyo macaan laba sbyoodba waanu u soonay,waa marka horee in aanu ilahay ku barino salaad kasta oo aanu tukaneyno anagoo ah kuwo xumaha ka dhowrsoon,waadna la socotaa in uu ilaah aqbalo ducada shabaab toobad keen ah,marka labaad ina goo jecel in aan la inaga dhex galin wax aqriskeena oo aanu si toos ah u billaabno waqtiga aan iskoolka ka nimaadno"

"xiliyada"ayaa saalax yiri markii uu kii ka waynaa hadalka dhammeeyey aanu gurigа ka baxnana ay noqdaan waqtiyada salaadda oo gura.

Aad bay uga cajabtay heerka ay joogaan iyo sida ay u fakarayaan farxad darteedna intay soo kacday ayey labada dhabanka dhunkatay iyadoo qoslaysa.

"dadaala,doonaa wuu gaaraaye"ayey ku adkaysay.

"Waa runtaa hooyo laakiin in ay ducadadu lagama maarmaan tahay ogsoonow"ayaa xasan u sheegay.

"mar kasta oo aan salaad dukanaayo anna waan idiin baryayaa ilaahay in uu idinku gudbiyo imtixaanka"ayey tidhi iyadoo ka sii baxaysa albaabka.

Inyar kaddibna waxaa la gaaray imtixa-ankii kama dambeysta ahaa .

Imtaxaanka waxay ku galeen xamr dsare, iyagoo dhiganaayey banaadir sare w xayna ge-li jireen iyadoo ay u dhowrsan tahay weysa-dii ay ku duka deen dalaaddii subax,sooman-na iyadoo ay weli u dhowrsan tahayna ka soo bixi jirden.

Sideedabana disa ay dugsiga sare u bi-llaabeen waxay jeclaayeen in ayan sicon we-ysa la,aan.imtixaankiina wuxuu u dhammaatay iyagoo faraxsan kalsoono weynna isku qaba halka ay kuwa kale ka qushuucsanaayeen waxa ay qoreen in yar mooyee guushaas bayna ku dhammeysteen.

Natiijadiisii ka horna waxaa yimid aa bahood toban cisho kolkii uu joogayna waxa la soo dhekiyey imtixaankiiwaxayna ka codsadeen in uu u soo cego isagu waanu ka aqbalay.

Wuxuu soo wada maray dhammaan warqadihii ku dheganaa derbigii iskoolka isagoo xashdii yaryd ee ay guu qornaayen rool lambarkooda gacanta ku haya uuna ka waayey midkoodna dibadda ayuu usoo baxay isagoo niyad jabsan soona dul istaagay gaarigiisii ,in yar markuu joogay ayuu ku noqday guduhii ... se wqrqadihiiba kaamil maaha intoodii baday dhiniciisa ayuu ka maqlay qaar barooranaya wuxuunu ku sigtay in uu ka qayb qaato oohinta ay kuwii gudbi waayey isla sihex maray-een.



laakiin intuu is dejiyey ayuu ku fakaray inuu xafiiska kasoo hubsado,illinkiisii markii uu u soo dhowaaday ayuu arkay ogeysiis ku dheggan albaabka kolkii uu aqriskeedii dhameeyey ayuu orad kaga soo baxay iskoolkii ,fudeydkiisahan add mooddo in culeys garbaha ka saarnaa laga tuuray.

Wuxuu yimid gurugii isagoo ay dadkii oo dhami illinka wada taagan yahay oo la sugaayo isaga.isla markii uu gaariga ka soo degay ayuu ku soo booday labadii wiil isagoo marba mid kor u qaaya.

"aabow,---na dhig,---aabe---" ayey ku celceliyeen.

"war,nimankaan waayeh iska dhig ma qaadi kartide "ayaa naka ka dhinac tidhi.

"ma ayagaaba niman dhul la dhigo ah, waaba sharfan yihiine"ayuu ku celceliyey isagoo garabka ka ahysta labadii wiil.

Wuxuu uga sheekeeyey qisadii qabsatay una sheegay in ay haleen kaalinta koowaad ee dugsiga,dhammaan walidiinta ardayda dugsigana lagu casumay gambabnimada jimca - ha ah.

Waxayna sugitaankooda ku noqotay sidii ciidida ramadaanka oo kale waxaase la soo gaaray aaqiritaankii.waxayna u soo wada caraabeen dugsigii sare ee badaadir iyagoo wada jira.

Kolkii ay yimaadeen waxaa cajab gelisay ubaha lagu hareereeyey illinka weyn ee dugsiga horay markii ay usoo galeen baa

baa dadkii oo uu horkacaayo maamulihii
dugsiga kawada istaageen sacab. sidii inay
eegti u wada ahaayeen labada arday ee ugu
wada sareeya dugsiyada dalka oo idil sana
dugsiyeedkaa,taasoo xataa aysan iyagu ogayn
Waxay fariisteen kutaastii llogu tala
xxxxx galay daqiiqado kadibna waxaa soo
galay W.W.W &barbaarinta oo ay la socdaan
madax sharaf leh gacmo furan baana lagu so
dhaweeyay.

Waxaana hadal gaaban soo jeediyay
maamulihii dugsiga isagoo u yeeray labadii
wiil, oo aan waalidkood oo qura sharafta
u keenin kana waramay afartii sano ee ay
dugsiga dhiganayeen,una mahad celiyay
waalidiintoodii ,wuxuuna u wareejiyay
wasiirkii,sacab baana lala istaagay.

Wuxuuna wasiirku ku nuux nuuxsaday
ahmiyadda weyn ee kacaanku kaleeyahay
waxbarashada isagoo ku booriyay waalidkii
kasoo qayb galay inay ilmahooda kawada dhi-
gaan saalaxx iyo Xasan;wuxuu iyana gudoons-
iiyay abaal marino uu dugsiga iyo wasaarad-
du ugu talo gashay wuxuuna cadeeyay inay
mutaysteen jaamacadda wadanka xxxxxxx
xx dibadiisa ah lana diri doono markay soo
dhamaytaan shaqada qaranka,markuu afkiisa
hadalkaa kasii dhameeyay baa dadkii oo idil
farxad iyo rayn rayn lajoogsadeen.

Muddo todobaad aha ayaa guriga Axmed
kasocotay casuumad,ay kasoo qaybgaleen dha-
maan asxaabtii Axmed iyo kuwii wiilashiisa.



## CUTUBKA SHANAAD

Karti,hawl karnimo iyo dadaal ay daaca-
di ku dheehan tahay ayay ku guteen sagaalk-
ii bilood ee shaqada qaranka waxaana lala
socodsiiyey in ay dowladda abaal marin uga
dhigtay waxbarasho heer jaamacadeed ah oo
ay ku soo qaadan doonaan dalka ingiriiska.

Habeenkii ay tagi lahaayeen,labahabeen
ka hor ayaa waxaa ku soo aaday sanadguurad-
ii 20aad ee ka soo wareegatay dhalashadii
xasan.sagaal iyo tobankii sano ee la soo
dhaafayna caado ayey ahayd in la dhigo xa-
fladda dhalashadiisa.

Axmed iyo xaaskiisu waxay ka ogaadeen
waqtigaa go,an,sawir ay ka dhex heleen ala-
abtii ay xaawoo wadatay,kasoo ay dhabarki-
isu ku qornayd dhalashadii xasan yaro.waxaa
la goostay in isla habeenkaas la qabto xaf-
ladda sagootiska iyo tan dhalashadaba.

Waxay ahayd markii dadka intii u dambe-
eysay ay ka baxeen albaabka xafladda,axmed
iyo labadiisii wiilba soo aaadeen qolkii fa-
dhiga si uu axmed ula sii dardaaro ayey ma-
qleen garaac xoogan oo albaabka ah.saalax
ayaa loo diray in uu furo eegana qofka xil-
ligaa dambe socda.markuu illinkii soo gara-
acay ayuu ugu yeehdhay.

"waa,ayo cidda bannaanka taagnayd"

"waa cumar madoobe"ayuu cod dibadda uga
jawaabay.waa uu ka furay,cumar isagoo dhid-
idaaya neeftuurayanaayuu si qof waalan

oo kale u weydiiyey.

"aaway axmed?"

"gudaha ayuu ku jiraa"intaaney wiilka afkiisa ka sii dhammaan jawaabta ayuu odaygii orod ugu gudbay qolkii fahdiga.

"war cumar maxaa ku helay oo xilligan kusoo jaribay?"ayuu axmed intuu soo istaagay su,aalay.kaddib markuu arkay cumar oo wejigiisu murugo ay ka muuqato iyo caalaamatu cajabba.

"axmadow cali baa xanuun ku soo booday"ayuu si deggan ugu jawaabay,isagoo ka baqaaya in uu hadalka qaldo.

"yaa !cali mire aa!"ayuu axmed la soo booday.

"haa "ayuu ku celiyey isagoomadaxa ruxaya.axmed wiilkiisii xasan ayuu u sheegay in uu baabuurka soo bixiyo bannaankana sii geeyo,sa lama uu guriga sii joogo inta ay maqan yihiin.daqiiqado gudahood bay yimaadeen aqalkii cumar,waxayna soo galeen qolkii uu cali ku jiray waxaana markaas la joogay xaaskii cumar,isaguna wuu taahayey, miyirna ma uusan lahayn,waxayna kula soo carareen gaarigii uu isteerinka u hayey xasan yare,aabihii iyo cumarna waxay dhabta saareen ninkii jiranaa.

Isbitaalka guud ee digfeer bay keeneen, inkastoo ay waqti xun ahayd haddana waxaa loo helay sariir la seexiyo,dhaqso ayaana looga gaaray,iyadoo ay taqaatiirtu markaa sheegtay in ay xaaladdiisu xun tahay ;axmed



wuxuu goostay in ay la seexdaan habeenkaas isga iyo cumar,maadaama uu cali ka mid aha saaxiibada kooban ee axmed,wiilkiisiina wuxuu u sheegay in uu guriga ku noqdo,aroortiina ka soo war doono.

Sidii la faray ayuu xasan sameeyey,subaxdiina waxay isasoo raaceen walaalkiis -sa lax,waxaynaka badaleen labadii oday ,aabahood iyo cumar madoobe,lana joogeen illaa iyo gabal dhacii.

Cali mire xaaladdiisu way soo wanaagsanaanaysay saacadba saacdda ka dambeysa, waxaana habeenkii xigay la seexday axmad oo qura,maalinnimadiina wuxuu awood u yeeshay in uu keligii socsocdo isna maamulo isagoo qura.

Axmed wxuuu saaxiibkii cumar u sheegay in uu abbabixinaayo wiilashiisa oo ta la yeeyey habeenkaas.

Reer xamed oo aan cidina ka hadhin ayaa soo aaday garoonkii diyaaradaha ee muqdisho gegida caalamiga ahayd ayey soo gaareen.maka iyo gabadheeda fartuun ahayd ka xumaan ay ka xun yihiin kala maqnaanshahooda dheer ayey la ilmeeyeen.si wanaagsan ayey isu macasalaameeyeen,ilaahna uga baryeen in uu somo geeyo soona samata celiyo.

Axmed aroortii ayuu ku soo kalahay isbitaalka,wuxuu na taqaatiirtii isbitaalka weydiiyeen xaaladda cali iyo goorta laga saari doono isbitaalka,wuxuuna u sheegay

in todobaad kaddib la saari doono haddii loo hayo meel uu nasahso ku qaato iyo daawooyin ilaa muddo lix sano ah,haddii kalana uu jo-ogaayo isbitaalkiisa.axmed wuxuu la socods-iiyey taqaatiirta in uu bixin doono todoba-ad kaddib hadduu eebe idmo.

Wuxuu ku soo laabtay aqalkiisii kaddib kolkii uu la soo tashaday asaxaabtii cumar, una sheegay xaaskiisa in uu jeclaystay in uu cali ka soo saaro isbitaalka,dejiyana qo-lkii ay wiila shu ka dhoofeen.way ku raacd-ay sidii bayna yeeleen.lix casho kaddib ca-li wuxuu jiifay qolkii wiilasha.

## CUTUBKA LIXAAD

Xasan iyo saalax goortii ay ka degeen london,kunahagaageen jaamacaddii loogu tala galay ayey soo direen warqad ay kaga hadla-yeen sidii uu ilaah u samo geeyey iyo in ay waxbarashadii u bilaabantay todobaad guduh-iis,waxayna ku soo waydiiyeen sidii uu noq-day cali mire oo ay xanuun ku ogaayeen .

Axmed aad buu ugu farxay qabaarkaas uu kahelay wiilahs iisa,warqad jawaab ah ee uu u celiyey ayuu ugu sheegay in dhammaan ree-rkoo idili uu caafimaadkoodu wanaagsan yahay, calina laga soo saaray isbitaalka,lana nool yahay iyaga iyo in hooyadoodii hore ay la aqal gahshay ninkeeedii Muqtaar oo muddo se-ddex sano ahba ku mehersanaa,iyagoo intaas ku maqnaa dalka sacuudiga,sedex habeen ka



horna habeenkaas uu warqadda qoraayo loo dabaal degay todoba baxoodii.

Aad bay ugu riyaaqeen warkaa loo soo tabayey,waxayna ka jeclaan lahaayeen in ay maanta xamar yimaadaan si ay farxaddaas u-la qaybsadaan dadkii ay adduunyada ugu je-claayeen,waxaynahawada u soo mariyeen tah-niyad kal iyo laab ah,iyagoo ilaah uga ra-jeeyey inuu ubad qayr qaba oo dadkiisa,da-lkiisa, iyo diintiisaba wax anfaca siiyo.

Waxaa xaafaddii axmad isugu soo hadh-ay fartuun,xaaskiisii iyo cali mire,abaxd-iina wada jir ayey u kalahi jireen cali mi-re hooyee,isagana waxaa si gooni ah u oga-an jiray oo mas,uul looga dhigay fartuun oo loo sheegay in wax alla wixii uu taban-aayo ay ka kaafiso,iyana waxay sameysatay qorshe ah in ay habeenkii illaa iyo gala-btii laba saac ay maaweeliso.

Galab qamiis ah ayey u soo gahsay ca-li oo ku fadhiya sariirtiisa,dhabtana ku haya album,una kala furan yahay,illinna ay ka da,ayso.intay istaagtay oo naxday ayey weydiisay"adeer maxaa ku helay?"iyadoo qa-rqareysa.

Intuu soo jeestay oo illintii iska ti-ray ayuu madaxa iyo gacanta oo wada socda ugu yeedhay,una tilmaamay in ay soo dhinac fariisato.

"adeer waa,ayo sawirkan?"ayuu su,aal-ay markii ay salka la heshay booskii uu uga bannaeyey sariirta.

"waa walaalkay xasan"ayey si gaaban u ugu jawaabtay kaddib kolkii ay aragtay kii uu tilmaamayey"adeer maxaad ku keentay in aad i su,aasho?"ayey aamusnaan yar kaddib weydiisay.

"yaah"ayuu yiri sidii nin hurdo ka baraaruhay"adeer waxaa uu isoo xusuusiyey oo uu aad ugu egyahay wiil yar oo aan dhalay, oo markii iigu war dambeysay da,dan oo kale ahaa"

"adeer ma xaas baad leedahay?"ayey su,aashay.

"maandhey hadda maaha waqtiga aan ka hadlayo oo waa labaatan sano ka hor"ayuu yiri xusuusna iska galay,iyana ma ahayn qof jecel in ay dadka qodqodo,isaguna ma ahayn mid mar walba ka hadla nafsaddiisa,halkaa ayeyna habeenkii uaga tagtay iyadoomoodeysa inuu seexday,balse uu indhaha uun isku hayyey,waaguna wuxuu u baryey isagoo fikiraaya.

Subaxnimadii jimcaha ayaa waxaa soo siyaartay saaxiibadii,cumarmadoobe iyo gamca dheere,oo aanu muddo sanad ah arag,kuna maqnaa gobokka jubada hoose.salaan kaddib ayey ka dareemeen in uu juuc ku jiro sidii nin dhafray.

"xalay miyaadan seexan?"ayuu cumar weydiiyey.

"waan isku dayey weyse ii suuruubu weyday,waayo waxaa hortayda iiga muuqanaayey wejiyadii shaqsiyaadkii aan aadka ugu gefay ayuu cod qafiif ah ugu jawaabay.



"cali saaxiib waxba ha is xumaynin" ayuu gamca dheere yiri isagoo gartay halka uu saaxiibkii ka hadlay"waxaa waajib kugu hah in aad ugu seexato sariirtaada sidaad u gogllatay,taasoo aan ula jeedo in aad qaabisho natiijada gal kasta oo aad qabato,samirna aad lahaato".

"caliyow ma waxaad illowday tusaalooyinkii uu taqtarku ku soo diiyey,in aad soo jeedka iska ilaaliso sidiisaba sow kamamid ahayn"ayaa cumar soo xusuusiyey,raacshayna"saaxiib walwalka iska dhaaf,nasashadana badso waa wax kuu roone"iyo tusaalooyin kale oo ay kuwaa ka mid yihiin ayey maskaxdiisa ku dajiyeen,isna markaa wuxuu u ballan qaday in uusan sinna kaga soo hor jeesaneyn wanooyinkooda.dabadeed way ka soo tageen iyagoo la socodsiiyey in ay si joogto ah uga warqabo doonaan.

Muddo seddex sano ah ayuu sidii taqtarku soo faray ra cayey,isagoo lixdii biloodba mar la xiriirayey taqtarka ,dabayaaqadii sanadkii seddexaad ayaana loo sheegay in uu caafimaadkiisu taam yahay,sidaana uu kusii socdo illaa uu ka dhammeysanaayo waqtigii loo qabtay.

Xasan iyo saalax markii ay waxbarashadii sabad iyo badh ka hadhsan tahay ayaa saalax bilaabay in uu ku kaco falalkii xumaa ee aabahood ka soo waaniyey oo ahayd in ay marnaba ka agdhowaan meelaha ay caaladu ku tumato.inkastoo ay ahaayeen laba qofood oo isku duuban xag walbaba

hadana saalx baa gooyey xudundkii ay xadeysteen,wuxuuna soo seexan jiray xilli dambe.habeenkii dambe ayaa xasan goostay in uu sugo walaalkii illaa uu ka soo jiif doonanaayo,wuxuuna soo jeed ku gaadhay illaa 9:00 saac habeenimo.saalx oo caga jiidaya aadna uudaal uga muuqdo ayaa soo furay albaabkii,furihii nalkana daaray,wuxuuna arkay walaalkii oo ku fadhiya sariirtii uu ku seexan lahaa.

"xaggee baad ka timi saacaddan?"ayaa xasan si cadho leh oo kullul u weydiiyey;

"maxaa adiga ku soo jeediyey saacaddan?"ayaa saalx su,aal ahaan u weydiiyey.

"taas meel dhege ,ii sheeg saacaddan noocaha aad ka timi?"ayuu ku celiyey.

"haddaba waxba ha i weydiin,haddaanad adiguba ii jawaabayn"ayuu yidhi isagoo ku sii jeesanaaya katabaanka.

"war hoy dhagayso"ayuu ku soo jeediyey isagoo garabka kasoo qabanaaya?.

"wiilyahaw yari ogow haddaanad joojin falalkaan xun xun aad ku kacayso in aan garan kuula tagaayoo ,saqajaanyohow aadaabta daran leha."ayuu si kulul u raacshay.

"adaa saqajaan iyo wax ka daranba ah". ayuu ku celiyey walaalkiis ka weynaa.afkiisii markii uu hadalka ka sii dhamaanayey ayaa xasan dhabanka dharbaaxo kaga dhawaajiyey.

Waxay ahayd markii gug horeysay oo u walaalkii gacan u qaado.subaxnimadii ayuu



isku dayey in uu iska maslaxo walaalkiis,saalaxse waa ka diiday,maqribnimadiina wuxuu la degay wiilashii uu xumaanta kula saaxiibay.habeenkaas wixii ka dambeeyey halka ay ku kulmaan waxay ahayd galaaska ay casharka ku qaadan jireen,jidkana way isku garab mari jireen sidii laba qofood oo aan is aqoon,dakana weynini ay dhex taallo.

Waxay dhammaatay jaamacaddii iyagoo ayan isku fiicnayn,walow uu xasan marar badan isku dayey in uu raalli galiyo saaxiibkii nkana qariyo waalidkii oo markii dambe ogaaday,waxayna xamar soo galeen iyagoo isku shahaado ah balse kala heer ah,xasana uu sareeyo.

CUTUBKA TODOBAAD

Waxaa xasan iyo saalxba xamar loohu soo dhoweeyey si aad iyo adcu wanaagsan , aabahoodna wuxuu u u bushaareeyey in uu siiyo guri fiillo ah oo ku yaalay xaafadda hodon iyo gaari 124 ah,todobaadyana waxay wiilashu ka bixi waayeen qaabilaadda dhallinyaradii la lood ka ahaa oo ku soo siyaaranaayey gurigii cusbaa oo lagu wareejiyey.

Kolkay laabaatan cishi joogeen baa aabahood ugu yeehdy si uu ula hadlo"wiilashaydiiyow "ayuu axmad hadalka uga bilaabay wiilashiisii."waxaan idiinkugu yeedhay in aan idiin sheego in maanta wixii ka dambe eya aan aoow u lahayn in aan isku wado

shaqadii aan intii aydinaan dhallan soo daba joogay ,waayo waad ogtihiin waxaa maanta aad u badan safarkayga,iskumana keeni karo in aan safro iyo qabadhada shaqooyinka halkan,sidaas aawadeed ayaan waxaan idinka rabaa in aad iigu kaalmaysaan oo aad noqotaan nimman rag ah oo ka soo dhalaala halka aan filayo.

"aabe waa figrad wanaagsan,laakiin maxaad noo kala qorshaysay?"ayaa xasan weydiiyey isagoo eegaya walaalkii oo madaxa ugu muujiyey in uu ku raacay su,aashaas.

"haa..waxaan jecleystay in xasanow adigu aad qabato xafiiska soo dejinta iyo dhoofinta ee ku yaalla guriga hooyooyinka,salaxna uu qabto maamulka baqaarada fariistana baqaarka ku yaalla "fiya eejoto"3".

"waa hagaag3 "ayey ku qanciyeen odaygii inkasta oo ay shaqadoodo adkayd haddana waxay aabahood ka ballan qaadeen in ay si wanaagsan uga soo bixi doonaan xilkaas adag ee dhabarka loo saaray.

Laba cisho kaddib ayey bialabeen hawlahoodii,salaadda subax kolka ay soo dukadaan ayey soo aadaan guriga hooyadood halkaasoomarka ay ka quraacdaan kaddib hore gaariga ugu soo qaadaan hooyadood iyo fartuun, waxaana loo hor gryn jiray fartuun oo dhiganaysay jaamacca ummadda soomaaliyeed"JUS", saalax oo isna ku hara baqaarkiisa ku yiil, "fiya eejito"waxaana ugu dambeyntii ku soo hara xsan iyo hooyadii maka oo iyana ku dagta



carwadeeda dharka ee ku tiil xamar weyne,iyadoo gelinka dambena ay fartuun iibinaysay carwada.kolii la gaaro xiliga qadada ayuu xasan qaadis ka soo bilaabaa hooyadii illaa uu fartuun ka soo gaaro oo ugu dambeysay.galabtii wuxuu xasan marmar ku kaalmayn jiray crwada walaashii fartuun,halka saalax uu uga laabto baqaarka.

Waxaa soo dhowaatay ciiddii arafo,wuuna xasan la joogista walaashii ka dhigtay mid joogto ah,waayo waxaa kordhay dadkii kalyantiga u shan dukaanka.galab ayaa isagoo xasan walaashii la joogga dukaanka waxa uu u sheegay in uu soo dukanayo salaadda magrikka,si fiicanna ay isaga adkayso dukaanka inta uu ka maqan yahay.

Goortuu ka soo laabtay dukaankii ee uu usoo socdo carwadii ayey indhihiisu qabteen gabar aad u qurux badan aadna u da,yar oo xidhnayd saako madow,horaadkana ubax kaga swiran,garbahana ay saarnaayeen garbasaar cad,wiil da,diisa uu ku qiyaasayna toban jir ay gamcaha ka haysay.wuu istaagay si uu uaga il bogto.gabadha quruxdeeda ayaaba ahayd in dhallinyarada midkii dhinac dhaafaba ay ku qasabto in uu gadaal gadaal u socdo si ayan indhihiisu uga libdhin quruxdaas waddada dhex socota.

WAxay soo dhinav istaagtay xasan si ay jidka u goyso ,kolkay hubsatay in uusan gaari soo dhoweyn ayey wadada ka talaw is tiri, iyadoo wiilkii yaraa gacanta ka haysa,waxaase jiiro uga soo baxay gaari Volks-wagan ah

markay indha saartay in uubaabuurku ku soo dhow yahay ayey qaylisay iyadoo gadaal u soo boodaysa,wiilkii yaraana waddada kusii daysay.xasan oo goor uu booday aan oheyn ayaa wiilkii ka dhex dafay wadada ulana booday gadaal,darawalkii gaarigana aad buu u dadaalay oo wuxuu cagta ku boobay fariinkii,laakiin baabuurkii oo aad u qabow baa ka dab ataagay xasan oo jug yar siiyey.xasan oo weli miyirkiisii leh,wiilkii yaraana xambaarsan ayaa wuxuu mar labaad ku soo dhacay marsha biyoodigii.

Dadkii wadada dhinacyadeeda marayey oo badankood afka kala taagay ayaa ku soo yaacay meeshii uu xasan ku soo dhacay.

Markii ay arkeen in labadii wiilba ay bed qabaan ayey u mahad celiyeen xasan badbaadinta wiilkaas yar,weyna u wada riyaaqeen.

Intuu gabankii yaraa kor usoo qaaday ayuu lasoo aaday xaggii gabadha mucjisada ahayd ee waday.xasan kolkii uu la soo aaday ayuu wiilkii udajiyey,inankii isna intuu cararay ayuu ku booday gabadhii.sida ay isugu maqan yihiin markuu arkay ayuu intuu hoosta ka qoslay isaga dhaqaaqay.

"walaal "ayey ku soo jeedisay isagoo sii socda"aad baad u mahadsan tahay"ayey tidhi iyadoo ilmaynaysa,garanna la, waxa ay ku ahadasho.waxay jecleyd in ay ku booddo dhabanadana ka dhunkato wiilkan badbaadiyey nolosha wlaalkeed,laakiin intay isku yaxyaxdat ayey hoos u foorarsatay.



"walaal waajibaadka la isagama mahad celiyo"ayuu yidhi,mahadna adinkaa mudan.

"wiilkan walaalkay ah ayaan jeclaystay in aan usoo iibiyo dharka ciidda"ayey tidhi.

"inna keen"ayuu yidhi,isagoo kor usoo xambaaraya wiilkii yaraa ,waxayna soo galeen carwadii oo markaa faaruq ahayd.intuu gudaha soo galiyey ayuu ku fariisiyey wiilkii yaraa kursigii qasnadda,gabadhii la socotayna gafiisiyey kursigii ay fartuun ku fadhiday,wuxuuna u dalbay cabitaan qabow,waxay nasteen illaa inankii yaraa ay ka baaba,do naxdintii uu qaada .

Xasan wuxuu soo qabtay dhowr joog,kuna cabiray gabankii yaraa,ugu dambeyntiina wuxuu u helay isku joog qurxoon aadna ugu haboon.intuu laalaabay baana ku riday ayuu u dhiibay wiilkii,qasnadana ku riday qiimihii dharka gabadhii oo aan arkayn,inankiina intuu la soo cararay dharkii ayuu u keenay walaashiis oo la sheekeysaneysay fartuun.intay soo istaagtay gabadhii ayey u mahad celisay,damacdayna in ay qarashaka bixiso ,waxaase loo sheegay in la bixiyey.

Sidey u kakhakatay ayuu ka gartay xsan in ay u baahan tahay wehel,banaanka intuu usoo baxay ayuu weydiiyey.

"abaayo----eh---"

"sahra aadan"ayey kaga dhex gashay su,aashiisii,iyadoo aqoonsatay in uu magaceeda raadinayo.

"abaayo,sahra ka hadal haddii aan kusii dhoweeyo". 

"waan jeclaan lahaa"ayey u sheegtay.

wuxuu ku soo noqday dukaankii una sheegay walaashii in uu usoo laabanayo,gabadhii oo ka sugaysay in uu lug ku sii dhoweeyo ayuu ugu yeedhay in ay gaadhiga soo fuusho,iyadoo laaban ayey ka gashay albaabkii shukaanta la deriska ahaa,ee laga furay walaalkeedna dhabta saaratay.kolkii uu gaadhigii kaxeeyey ayuu su,aalay halka ay deggan yihiin,una sheegtay in uu gurigooda ku yaallo xaafadda shibis waddada nasiib buundo, marka la dhaafo isgoyska bilaajo.markii uu gaarigu socday in xoofaa ah ayuu xasan su,aalay wiilkii yaraa magaciisa.

"nuur aadan"ayuu ugu jawaabay inankii yaraa"aboowe adigana"ayuu u daba mariyey.

"aniga xasan axmad ayaa la iigu yeedhaa""iskuul ma dhigataa"ayaa xasan haddana su,aalay kaddib markii cabbaar la aamusnaa,

"haa"ayuu si gaaban ugu jawaabay gabankii.

"fasalkee"

"seddexaad"

Intaanay hadal kale is dhafsan ayaa sahra u sheegatay in la joogo xaafaddooda, gaarigana joojiyo,markii ay ka degeen ayey sahro u soo wareegatay daaqaddii gaariga?

"xasan"ayey cod qafiif ah ku tidhi iyadoo gacanta gacanta u galineysa"aboowe dhab ahaantii aad baan u mahadsan tahay,ma aan garanayo wixii aan abaal kuugu gudi 1 lahaa"xasan intuu dhoolla caddeeyey ayuu



si debacsan u yidhi"waxaan abaal marin u jeclaan lahaa in aad i amaahiso wadnahaaga" isagoo weli gacanta ka haysta,

"waan kuu awoodaa haddaad tahay nin aaminka ka bixi kara"ayey sahra warka ku goysay.xasan aad buu ula yaabay inta ay la egtahay inanta iyo halka ay hadleyso.

"aad baad u mahadsan tahay wahaal wax weyn bayna ii ahaan lahayd sahra,haddaan habeen dambe kula kulmo"ayuu yidhi isagoo hoos eegaya awoodna u waayey in uu ku adkaysto fiirinta wejigeeda luulka ah.

"waxaan kugu sugayaa taallada daljirka dahsoon dhinaceeda xiga dugsiga yaasiin cusmaan 7:30 fiidnimo "ayey u sheegatay,gacanta intuu ka dhunkaday ayuu u mahadceliyey, layaabkiisiina waxay ugu badashay in ay dhabanka ka dhunkato.

Illaa laga gaaray habeenkii ballanta xasan wuxuu ahaa mid saacadba saacadda ka dambeysa ka sare marayey dayaxa.

Wuxuu soo istaagay halkii ballanta isagoon daqiiqadna soo hor marin midna aan dib dib u dhicin,illaa muddo saacd iyo badh ah ayuu sugayey,wuxuuna watey labis aad u bilicsan ee uu ka soo iibsaday waddanka ingiriiska,funaadad isugu jirta diilimo cad iyo madow ah iyo surwaal jiinis cad ah,waxaana ka so carfayey barafuun,qofkii dhinac maraana wuxuuba iska jeclaan in uu iska dabo galo si uu uga bogto caraftiisa.xasan wuxuu taagnaadaba,wax u soo socda malaha sidaas

kuma uusan quusan ee waxa uu soo abbaaray
halkii ay kaga hartay habeenkii hore,wuxuu-
na weydiiyey dhallinyaradii deggeneyd xaaf-
adda,waxayna u wada sheegeen in ayan garan-
eyn gabar loogu yeero sahra aadan oo xaafa-
ddooda deggan.

Isagoo niyad jabsan ayuu isaga soo la-
abtay gurigiisii,waxa keliya ee uu ka walw-
alsanaa waxa ay ahayd sida uu mar kale kula
kulmi lahaa iyo halka uu ku arki lahaa gab-
adhii quruxda badnayd oo uu hubay in aywax
uun ku qasbeen macnaanshaheeda waayo waxaa
ka garan kartaa indhaheeda in ay tahay dad
ka ballanta xoojiya.

" Haddii aan aqoon lahaa gurigeeda wax
dhan bay ii ahaan lahayd"ayuu isaga cataab-
ay isagoo dul saaran gaarigiisa,awoodna u
waayey in uu iska saaro labiskii uu galab
dheer ku qashaday foorida.

CUTUBKA SIDDEEDAAD

"maxaa helay odaygii waardiyaha ahaa"ay-
aa cali mire weydiiyey axmed oo u fadhiya
casirya wiilkiisii xasan ahaanna uu ka soo
gorjeedo,muddo seddex habeen ahba waxaa ga-
raashka guriga ilaalinayey cali mire"

"malaha xanuunkii uu sheeganaayey baa ku
soo saa,iday inta uu naga maqnaa ,laakiin
aniga ayaa ku toolmoon caawa in aan soo eeg
ayaa axmed yiri.in cabbaar ah markii ay she-
ekeysanayeen oo uu caline dhiniciisa ka fa-
riistay ayaa waxaa soo dhacay telifoonkii



cali baa kacay oo qabtay.

"hello---haa"intuu yiri cali,ayuu u gud-
biyey telifoonkii axmed,isna intuu soo ist-
aagay ayuu qabtay dhegtii telifoonka.

"hello,haa waa cafimaad---yaah--shee-
kh aadan aa!--innaa lillaahi wa innaa iley-
hi raajicuuun--iminkaan imaanayaa"intuu yiri
ayuu telifoonkii ku celiyey halkiisii,una
sheegay cali iyo xasanba in odaygii waardi-
yaha ahaa ee ay dhawaanta sheekadiiisaa ha-
yeen uu geeriyooday.

Xasan abihiis intii uu labisanaayey ayuu
ayuu sii diyaariyey baabuurkii,axmedna int-
uu soo galay gaarigii ayu u sheegay wiilk-
iisii halka uu ku yaalay guriga waardiyaha,
daqiiqado kaddibna weyba yimaadeen,wuxuuna
ahaa mid uu dhismihiisu ahaa alwaax.

Intii uu xasan gaariga soo xirxiraayey
ayaa aabihii galay gurigii una tacsiyeeyey
reerkii,gudahana usii gudbay si,uu ula soo
xaajoodo islaantii uu ka geeriyooday odaygu.

Xasan markii uu illinka kasoo galay ay-
ey indhihiisu qabteen sahra aadan oo wiilk-
ii yaraa nuur uu dhabteeda ku oynaayo.irid-
ka ayuu ku hakaday awoodna u waayey in uu
gudbo.halkaa wuxuu ka gartay in uu sahra aa-
baheed ahaa waardiyaha guriga.markuu in do-
or ah taagnaa ayaa waxaa ku soo jeestay nu-
ur,kolkii uu arkay xasanna ayuu ku soo car-
aray.

Xasan isagoo wiilkii yaraa xambaarsan
ayuu u soo dhaqaaqay xaggii gabadha,gacant-
ana garabka ka saaray.

"aabaayo, sahra allaha u naxariisto wuu inaga wada dhintee" ayuu ugu tacsiyeeyey. kor ayey u eegtay afkana kala qaaday oo ay haddana isku qabatay goortay wax ay ku hadasho garan weyday.

Xasan markii uu aabahii soo baxay ayuu u sheegay in uu iska tago koligii isagana uu ku harayo reerka oo uusan kasoo tagi karin illaa uu ka dejiyo kana baabi, iyo oohinta wiilka yar, odaygii waa uu ku booriyey, isna kolkii uu seexiyey inankii yaraa ayuu soo aaday aqalkiisii.

Subaxdii xigtay ayaa meydkii odayga lagu soo aasay xabaalaha macallin nuur ee Km.13.

Galabnimadii ayuu xasan u sheegay walaashii in sheeqii waardiyaha ahaa uu dhalay gabadhii iyo wiilkii yaraa ee habeenkii hore dharka ka iibsanayey oo uu sii dhoweynayey isaga inanka yarina aanu qof aan isaga ahayn ku qancayn, wuxuu kaloo u sheegay in gabadhu tahay mid qalbigiisa ku qormatay kuna fiirsan karin murugo. waxay iyana usoo jeedisay mar haddii ay arintu sidaas tahay in uu u kaxeeyo dalxiis illaa uu maskaxdooda ka tirtiraayo naxdinta geerida aabahood, isna aad b uu ugu riyaaqay fikradaas. kolkii tacsida laga baxay ayuu xasan ka cadsatay sahra iyo walaalkeed in ay u raacaan dalxiis illaa xeebta sambuusi ah? IYANA Ink-stoo ay miicmiic gelisay haddana way ku raacaday, wuxuuna u sheegay in ay bixi doonaan maalinta labaad ee iidda arafo;

Waxaa la soo gaaray maalintii, wuxuuna xasan ku soo aaday gurigii reer aadan, isagoo wata gaarigiisii 124ka ahaa, kolkii uu soo galayna wuxuu arkay sahra iyo nuur oo la fadhiya islaantii uu ka geeriyooday sheekh aadan oo sidata dharkii cadcaddaa ee asayda ahaa, naagtaa oo ahayd sahra eedadeed ama hooyadeed, in yar kaddibna waxay u sheegeen in ay diyaar yihiin oo ay bixi doonaan;

Sahra waxay fariisatay kursigii gaariga ee hore, nuurna kuu dambe, sheekooyin qosol leh ayuuna ku dhaafiyey kontoroolka xamar, waxaana gabadhii mucjiso ku noqotay in ayan xusuusan waqtigii ay soo dhaafeen KM13. kolkii ay kontoroolka ka talaabeen ayuu xasan bilaabay in uu wilka yar u sheeg sheego meel kasta oo ay markaa dhaafayaan magaceeda.

Waxay yimaadeen hoteelkii xeebta sambuusi xilli qado, markii ay cunteeyeen kaddin ayaa ay in xoogaa ah sheekeysteen. intii ay xifaaltamayeen ayaa xasan gartay in uu inankii yaraa hurdooday. intuu qaaday ayuu soo seexiyey qol ka mid ah kuwa hoteelka, kuna soo noqday halkii uu ka kacay.

"xasan "ayey tiri sahra kaddib markii uu salka la helay kursigii uu ku fadhiyey "aad baan uga uga xumahay dhab ahaantii ballantii ugu horeysay ee aan kuu dhigay inaan kaaga baxay"

"waxba maaha taasi,sahra"ayuu yiri,in yar kolkii aamusnaana ra ciyey"laakiin---waxa keliya een ka walwalaayey waxay ahayd sidii aan mar kale kuula kulmi lahaa"

Sahra intay iska qososhay ayyey ka codsatay in ay in yar iska socsocdaan xeebta dhinaceeda.goortii ay in yar socsocdeen ayey weydiisay"xasan aboowe ma ku su,aali karaa waxa kugu qasbay in aad na soo dalxiisiso"iyadoo uu xishood ka muuqdo.

"sahra,walaal marka dhabta loo hadlo, waxaad tahay qof aan aad ku xiiseynayey una xushmeynayey tan iyo markii aan ku bartay, waxa keliya oo aan rabana waaa farxaddaada. u maleynmaayo in aan joojinaayo taas waayo aragtida aan ku arkaayo adigoon faraxsaneyn ayaa waxay ii sii dhoweyneysaa waalli"sahra hadalkii dabacsanaa ayaa jiiray.intay is hayn weyday ayey ku soo booday iskuna martay wiilkii dhinaceeda socday,sidii geed naar oo kale,cod qafiif ahna ku tidhi.

"xasan---waan--))-ku jeclahay"

"ma anigaa ku jecel mise adiga "ayuu yiri isagoo isku adkaynayo sidii in ay ka fakaneyso,iyana madaxa ayey ruxday iyadoo muujinaysa in ay iyadu jeceshahay in badan.

In yar kaddib ayey ku soo laabteen saantoodii iyagoo garabka iyo dhexda is hays-ta,wuxuuna soo xusuusiyey galabtii ugu horeysay ee uu arko.

"sahra aad baad u qurux san tahay"ayuu yiri.

"waad mahadsan tahay ayey ku celisay.



"ma la socotaa in ay quruxdaadu galabtii iigu kaa horeysay va rag badani maanka kaxaday oo ay qaar waddada u istaageen in ay kaa il bogtaan,qaal kalena aad ku qasabtay in ay gaadaal gadaal u socdaan si aadan uga libdhin!"

Qosol ayey la dhacday sahra,iyadoo qosleysa bayna weydiisay"ma ka mid baad ahayd kuwii dhabar dhabarka u socday "

"dan iga reebeysa baanan jirin"ayuu ugu jawaabay isagoo dhoolla caddeynaaya.aamusnaan yar kaddib ayuu hoos u eegay gabadhii ku lamaanayd,naxdin buuna la istaagay kolkii uu arkay gabadhii dhawaantan faraxsaneyd oo ilmeyneysa.

"maxaa ku helay gacaliso?"ayuu hoos u weydiiyey isagoo ka soo horjeeda,garbahana ka haysta.intay iska masaxday ilintii ka da,aysay ayey tiri:

"xasan waxaa maskaxdeyda ku soo dhacday dhallinta maanta jirta in ayan ahayn kuwo la isku halleyn karo"

"oo adigu ma rag oo idil baad soo aragtay?"ayuu su,aalay isagoo yaaban.

"maya"

"haddaba maxaad ku keentay in aad dhallinta oo dhan wada eedeyso"

"runtii xasan waad la socotaa in aan iska ahay qof iska diciif ah,waxaana arkay in gabdhihii ila xaafadda ahaa ay ka wada cabanayaan raggii loo wada socday oo ay sheeganayaan in loo been abuuray oo la marin

habaabiyey"

"sahra"ayuu yiri isagoo fidinaaya gacantiisa midig,horna dhigaaya iyada"farahaasi ilaahay ma wada simin,ragguna waa sidaas oo kale,weligaana iska ilaali in aad ummad dhan u xumeyso midka xun ee ku dhex jira ee aad adigu aragtay ama ku dhec maqashay"

"waa hagaag gacaliye"ayry kaga qa datay waanadii inyar kaddihna waxayba soo a gaareen hotelkii.

Markii la gaaray11:30 maqribniiho ayey ka soo galnabeen hoteel sambuusi soona aadeen xamar.baar ismaaciil ayey laba saac oo rubi dhimahn kasoo cashooyeen,xamarna soo galeen fiidnimadii iyagoo aad u faraxsan.

Xasan kolkii uu ku soo dhowaaday xamar ayuu arkay saaxiibkii,daahir,ninkii uu dhallinyarada ku lahaa,oo fadhiya derbiga aqalka hortiisa ahaa.baabuurkii intuu albaabka dhiniciisa dhigtay kana soo booday ayuu ka hor geeyey"wax haye daahir ii waran?"

"waa nabado,adigana?"ayuu si gaaban uaga qaaday salaantii.

"kolkey caawa dayaxa waan ka sarecyaa"

"aad baan ugu faraxsanahaynin aan kaa maqlo,laakiin aan ku weydiiyee ma shimbirtii aad baadi goobaysay baa dhabaqa ku so o dhacay?"

"ishaad ka riday"ayuu xasan yiri,qosol



baynala dheceen.

"anna caawa oo idil baan ku dugaayey" ayuu daahir yiri.

"ma wax dhibaato leh ayaa jira?"ayuu si dabacsan u weydiiyey.

"marka dhabta loo raaco maya laakiin waxaan arkay walaalkaa saalax oo waddo qallad ah ku socda"

"oo maxay tahay?"

"runtii waxa uu ku saan dersaday gabadh ay dabeecaddeedube tahay in ay dhallinyarada lacag ka shaxaado,taasoo aan ku fikiray in ay tahay mid idaga u daran la socodkeeda,naftiisa iyo maalkiisaba"

"haa "ayuu yiri xasan,aamusnaan yar kaddibna raacshay"waa tuma gabadhaas,ma mid aan bar garanaayaa?"

"ma taqaanid laakiin anigu ayaa ku tusi doona"

"ka waran haddaan habeen dambe raadiyo" ayuu soo jeediyey isagoo doonaaya bal in uu arko waxa gabadhaas laga sheegaayo,ka horow intaanu la hadlin walaalkii.

"waa figrad wanaagsan"ayuu daahirna ku raacay.

"waad la socotaa in aan la,aantaa wax qabsan karin taasina abaalkeeda mid aan gudu karo maaha"ayuu xasan yiri isa oo garabka jug ka siinaaya saaxiibkii.

"ka badan ayaan isku leenahay"ayuu xusuusiyey isna.

ka badan ayaan isku leenahay"ayuu xusuusiyey isna.

Habeenimadii baa sidii ballantu ahayd lasoo baray gabartii oo loogu magacaabay caasha,waxayna noqdeen laba qofood oo is af fahma,todoba habeen ayuuna habeenna la joogay sahra oo uu kala sheekeysanayey sida uu mustaqbalkoodu noqon lahaa;haneenna caasha oo uu been iyo bahashii nacala aaheed ku yaal ahayd ku waalayey.

Subaxnimadii dambe ayuu soo qabtay baqaarka si uu u kaalmeeyo walalkii,isagoo xidhay xafiiskiisii.markii uu u soo dhowaaday ayuu arkay saalaxx oo la taagan caasha,wuxuu ku hakaday darbi u dhowaa,in yar kaddibna wuxuu saalax jeebkiisa ka soo bixiyey lacag aan yarayn,fartana ka saaray inantii hor taagnayd.xasan intuu damcay in uu xagoodа soo aado ayuu haddana ku fakaray in ay ka haboon tahay in uu guriga kula hadlo.

Casarkii markii la gaaray ayey isugu yimaadeen gurigooda.

"saalax yey ahayd gabadhii baqaarka" ayaa xasan weydiiyey kolkay isugu tageen gusaha.

"waa gabadhii mustaqbalka"ayuu ku jawaabay sidii in uu hadalka afka u saaran yahay.

"ma naag baad weyday marka aad leedahay taas baan ka dhiganayaa mustaqbal.

"u kaadi walaal"ayuu si kulul u yiri.



"maxaad ka taqaanaa waa adiga sidaas u xumaynayee"

"waxaan ogahay in ay tahay waadi ninkii oomanba uu haan ka darsado3"

"wali ma tuuratay wadaan ceel kaas aad tilmaantahay in uu dadka oo dhan ka darsado" ayuu si jees jees ah u su,aalay.

"haa "ayuu xasanna ku been abuuray.

Ogaan ayuu saalax qosol la dhacay,waayo wax uu yiqiinay waxa ay caasho guddo iyo waxa ay gabso.sariirta xageeda ayuu isaga dhaqaaqay.

"maxay ahayd lacagtii aad saakayto siinaysay"ayaa xasan su,aalay isagoo aan deganayn.

"you have no right to ask me that question.that is a private matter between she and myself.it has got nothing to do with yuo,so just stay out of it!"

"listen.."ayuu ku hakaday markuu dareemay in dhabarkiisa la taagan yahay.kolkuu eegayna wuxuu arkaa hooyadiis oo kaddinka albaabka qotonta,halkaas ayuuna ka gartay sababta uu saalx ugu hadlaayey afka ingiriiska.salaan kaddib waxa uu aaday xagga suuliga waxaana isugu soo hadhay maka iyosaalax.

"maxaad ku heshiin la,dihiin adiga iyo walaalkaa"ayey weydiisay.

"hooyo"ayuu yiri isaga oo qoslaaya"xasan waa nin aan lala heshiin karin,waayo soomaalidaa hore u tiri laba lalama heshiin

karo nin qab weyn iyo nin aan uba qabin"iyo nin quud jecel iyo nin aan quurin",walaalkayna waa nin isla qab weyn haddana aan waxba quurin"

"waryaa saalx"ayaa habartii ku qaylisay"waa walaalkaa kaa weyn xaqna uma lihid in aad sidaas uga hadasho oo waxaa kugu waajib ah in aad u xilqaanto ugana dambeyso sida aabahaa"in door ah weyna waanisay,iyadoo ka dareentay in uu xumaato u haayo walaalkii.ugu dambeyntiina markii uu ka qaaday ayey ka soo tagatay.

Hooyonimadii wuxuu xasan ballan la lalaa sahra wuxuuna u soo kexeeyey guriga,markii uu sii dhoweynayey ayuu u sheegay in ay aqalka ugu imaan karto waqtiyada ay doonto ,xilliyada uu xaadirka ku yahay.

DHowr habeen kaddib wuxuu caashana iisoo waday xaafaddiisii,waxayna soo galeen qolkiisii fadhiga ayagoo qoslaaya,wuxuuna u tilmaamay in ay ku fariisato kursigii waynaa.

"caasho"ayuu ku soo jeediyey.

"haa,aboowe"ayey ugu jawaabtay.

"waxaa jirta gabar aan ka kari waayey in ay iga harto anoo u sheegay in aan la socdo mid kale iyadoo ku adkaysaneysa in ayan sina igu deyneynin illaa ay indhaheeda ku aragto.waxaan caawa jeclaystay in aan kuu sheego maadaama aad adiga ila joogto si ay u quusato waxaana aan sii xushmad leh kaaga codsanaayaa in marka ay timaado aad —..."



"taas anigaigu hallee."ayey kaga dhex gashayisagoon hadlkii dhammeyn.

"waxaa ballan ah in aan anna caawa kaa farxin doono"ayuu ku wargeliyey.

Wax yar kaddib ayuu la socodsiiyey in uu doonaayo in uu telifoon u diro gabadhii iyana wey ka aqbashay,wuxuuna qolkii ku dhoganaa ka garaacay nambarkii carwada,nasiib wanaagna waxaa ka qabtay saalax oo uu ku ogaa halkaas"hallow"ayaa saalx yiri.

"hallow saalax waa xasane"

"haye,maxaa jira telifoonka sacaddaan ah"

"waxbana ee waxaa guriga kuu fadhisa inantii aad wada socoteen ee caasho oo caawa oo idil ku sugeysay ayaa xasan uu been sheegay walaalkii,isagoo ay ujeeddadiisu ahayd in uu tuso qofka uu saalax ku tilmaamay in ay sharaf leedahay in ayan lahayn haba yaraatee.

"wax yar ha i sugto"intuu saalx yiri ayuu telifoonkii sii ku celiyey halki sii; waxaana mucjiso geliyey cidda soo tustay gurigiisa.

Daqiiqado yar kaddib ayaa albaabkii ay xasan iyo caasha ku wada jireen la soo garaacay.

"soo dhaaf"ayuu yiri xasan,isagoo isku maraaya gabadhii dhinac fadhiday,caashana dhabanadiisii ayey dhunkasho ku boobtay. xasan wuxuu ku soo jeeday illinka iyana waxay ku sii jeeday wejigiisa.

layaankiisii waxaa iridda taagnaa sahra,filanwaa bay ku noqotay ee sho intay dareentay ayey eegtay halkii uu fiirinaayey,waxayna aragtay gabadhii albaabka taagnayd.

Sahra markii ay in dheheeda ku dheceen falkii uu xasan sameynaayey sidii gamuun la ganay oo kalana uga baxday illinka,iyadoo wajiga gacmo ga saarayso,iyadoo afku kala taaganyahay ayuu kasoo daba dhaqaaqay wuxuu markay iyadoo meel dheer sii cararayso,gortuu saan ka daba qaad is yiri̇na wuxuu maqlay guuxii baabuurkii uu watay saal xoo meelaan fogeyn ka soo yeehdyay.

Intuu soo laabtay ayuu u sheegay caasho in inantii uu ka daba baxsanayey ayan ahayn tii uu doonayey inay ku aragto balse ay iyadii ba soo socoto,daqiiqad kaddib ayuuna saalax soo galay albaabkii"aoo dhaaf ayuu sidii oo kale u yiri"saalax wuxuu soo riixay illinkii furnaa,wuxuna indhihiisa ku arkay walaalkii oo ku madhan inantii uu sheegay in ay isaga sugayso,intay madixiisa ka weynaatay ayuu albaabka ka baxay isagoo xoog u xiraaya,dhawaaq weynna ka yeersiiyey,labadoodaba ma ayan arag qofka iridda sidaas uga dhawaajiyey.

Xasan intuu qancay ayuu gabadhii warmoogta ahayd u sheegay in ay mahad san tahay, qarash in ka farxiso ahna faraha ugusii shubay illinkana kasii saaray.



wuxuu isla markiiba soo abbaaray guriga sahra aadansi uu uga dhaadhiciyo ujeedadii uu ka lahaa gabadhii ay ku araagtay isagoo ku madhan isagoo ogaa in uu dhibaato kala kulmaayo siduu filanaayeyna waxay fahamsiinteedii kala adkaatay ilko la siibayolaakiin ugu dambeyntii way ka aqbashay.

CUTUBKA SAGAALAAD

Caasha iyadoo cagajiid ah ayey soo aaday xaggii baqaarkii uu saalx fadhiyey ee saamigii kaadida ahaa ee ay iska qaaday,maskaxdeeda ayaa buuq ku abbuurmay,xasilloonidii oo dhan baa ka tagatay markii uu taqtarku u sheegay in ay leedahay uur inkastoo ay hubtay in uu saalx lahaa oo ahaa ninka keliya ee ay wax la wadaagtay intii ay noolayd,iyadoo taana u yeehsay jacayl ay u qabto aawadii.isna bil ka hor ayuu u sheegay in ay tahay qof aan iimaan lahayn maadaama ay isu keentay isaga iyo walaalkii ka weynaa,wuxuuna la socodsooyey in ayan soo istaaginmeel magaci isa lagu hayo iskaba daa meel uu joogee.

Iyadoo taas la socota ayey soo qabatay dhiniciisii aad bayna ula niyad jabsanayd sidii ay ugala xaajoon lahayd arinkaas kè ku soo kordhay;laabtana ay ku haysay in uuku san sinaba uga yeelaynin wax kasta oo ay la timaado,si kasta oo uu u ogyahay in ay run yihiin.

Ugu dambeyntii baa laso gaaray baqaarkii waxayna soo gashay iyadoo gorada hoos u laadlaadinaysa awoodna aan u lahayn in ay kor u eegto si ayan filayn ayuu u qaabilay,markii ay u sheegatay in ay isaga doonayso si ay ugala sheekaysato arimogaarah,wuxuuna la socodsiiyey in ay caawa ugu timaado gurigiisa haddana uusan sinaba firaaqo ugu heleyn,iyadoo sidii ay ugu timid kor raja fiican ayey kasoo tagtay.

Waxay timid gurigoodii iskuna tuurtay sariirteedii,cabaar markii ay saarneyd ayey riyo la tagtay,waxayna aragtay iyadoo saalac la aqal gashay,aroosko ddiina dhallintadii taqashay oo dhan u wada riyaaqday, waxaana riya maalmeedka ka dhex galay codka aabaheed oo u yeeranaaya biyo.

Intay glaas biyo ah soo dartay bay ugu keentay sariirtii uu dul saarnaa.

Wuxuu ahaa naafo aan gamco iyo lugo uu wax ku qabsado aan lahayn ilmana wuxuu lahaa caasho iyo gabadh ka yar oo labadooduba ay kala qaybsadeen xanaaneynta aabahood oo xilli waxaa la joogay gabadha yar xilliga caasho,waxaana rarshinka lagu siin jiray sariirta dusheeda,saxaradana halkaas ayaa looga qaadi jiray.caasho walaasheed canab wax firaaqo ah oo ay haysay ma jirin inkastoo ay dhameysay dugsiga sare caashana waxay ahayd macallimad "pp"ah waxayna wax ka dhigaysay dugsiga hoose ee hawlwadaag,waxayna ku noolaayeen mushaharka ay



qaadato caasho iyo wixii kaalmo ah oo ay ka helaan eheladooda iyo deriskooda.

Wixii ay caasho shaxaad u soo heshana waxay ku soo iibin jireen daawooyinka iyo alaabada muhiimka ah ee aabahood u baahdo, caasho wuxuu gabalku u dhacay itadoo sariirtii uu odaygu ku duuduubnaa dhinac fadhida.

Habeenimadii ayey soo abaartey goobtii balanta oo ahayd aqalka saalax ,garaac yar ka dibna waxaa ka furay saalx oo ay macawisi u xidhan tahay,shukumaana garabka u saaran yahay wxuuna usoo hogaamiyey qolkii fadhiga, cabitaan ayuu uga soo saaray qaboojiyaha oo hor dhigay isagoo kursi kasoo hor jeeda fariisanaaya.

"caasha,maxay tahay arinta aad goosatay in aad aniga igala xaajooto"markii uu salka la helay kursigii.

"waa mid adiga iyo anigaba ina qusey - sa"ayey ku jawaabtay iyadoo dhulka eegeysa hadalkana la baqaysa.

"wax dan ah oo naga dhexeeya miyaa jiray?"ayuu haddana weydiiey.

"maya,laakiin---waa---natiijadii wixii aan hore u tabcanay"ayey tiri iyadoo kohanaysa.

"waa qayre, maxaa kasoo baxay"ayuu ku dhiiriyey isagoo ka dareemay in ay hadalka la qabsaneysa.intaana markii ay dhegaheeda ku dheceen ayey isku boorisay in ay is giijiso.

"saalax,waxaa igusoo baxay---een --uur" ayey ugu dambeyntii tiri.

"yaah!"ayuu lasoo boday.

"waadhab"ayey ka dabo tiri.

"ujeedadaaduna ma saalax baa keenay baa"

"haa"ayey si gaaban ugu tiri.

"markaad meel aad saarato weyday miyaad ila soo aaday aniga"ayuu ugu dul maray isagoo og in uu lreeyahay uurkaas.

"waa og tahay in aanan xumaato kula soo raadsadeen"

"bulshada aad la sheekeysato waa ay badan tahay ee mard la aadid haddana "ayuu xusuusiyey.

"saalax"ayey tiri iyadoo gorodda hoos u laadlaaninaysa,hadalkuna kasoo bixiddiisu kuradag yahay"waxaad tahay ninka,keliya ee xog ogaal ka u ah arintayda,shaqsiyadeyda gaar ahaaneedna yaqaana si aanu u aqoon nin kale,xitaa aabihii i dhalay baha ahaadee,aniguna waan kuu qirsanahay in aankaa galay qalad weyn,walow aanu igaga dhicin ula kac, haddana aan isku dayey in aan ku fahamsiiyo sababta igu kalifay inkastoo aadan iga caadan,intii aan ku kala tagnayna anoo ogna arintan caawa kuulama aan imaadeen haddaaney-iga dhab ahayn"

Aamusnaan ayaa kala dhex gashay waxaaha hadalkii dib u furay saalax.

"caasho runtii anigu waan ku aaminsanahay,mamaba kuma seexanaayo in qofkii dacad kuula hadla aad xumaan u sheegayso,naf-



saddeydana intii aad ka maqnayd aad bay kuugu xiistay,qabaarkaan aad caawa ii sheegaysana waan la socdaa in uu ka dhexeeyo aniga iyo adiga keliya"hakad yar ayuu geliyey"waana aan ku guursan lahaa,laakiin waxaa jirta in aniga iyo wiilka walaalkay ah aanu kugu dhadnay adiga intii aadan la kulmin isaga,isagoo ii sheegay in aad tahay qof xun,aniguna aan ku adkaystay in aadan lahayn waxa uu kugu tuhmaayo anoo ka tixraacaayey sidii aan kugu ogaa,wadaalse uu iiga xaqiijiyey wixii uu ku doodaayey, uuna iigu goodiyey in haddii aan aftarda maro uu aabo ii sheegaayo,sababayna waxaan in aanan laqii noolaaneyn haddii uu ogaado,waayo xasan waa ninka uu talada ka qaato.

"maxaynu qabanaa hadda"ayey su,aashay iyadoo infiriirsan.sidii nin ay figradi ku soo dhacday ayuu saalax intuu soo istaagay soo dhainac fariistay,garka ayuu ka qabtay madaxeedana kor u qaday.

"caasha,haddii aad ficil yar sameyso waxaa hubanti ah in aan ku guursanaayo" ayuu kusoo koobay warkii.

"muxuu yahay ficilkaas"ayey su,aashay iyadoo diyaar u ah tala kasta ee uu u soo jeediyo haddii uu marba guursanaayo.

"waa arin adag halse inoo dan ah in aan sameyno"ayuu u,sheegay ,raacshayna"sidaad la socoto,waxa keliya ee na hortaagan waa walaalkay xsan,haddii aanu iska leexi-

nāna waa ay inoohagaagayaan wax walba,adiga ayaana ah qofka kelliya ee inaga saari kara"

"oo sidee baan ku saari karaa?"ayeysi anfiriir ah u weydiisay.

"waxa keliya oo aad kaga saari kartaa waa,adigo yimaadda gurigeenna,dushana ka saara waalaalkay uurkan oo aan anna k uugu marqaati furi doono"

"saalaxow tusi samcyntecda waa dambi weyn"ayey tartiib u tiri.

"waa runtaa laakiin tasa la,aanteed wax inoo hagaagayaan jrin,waayo inta waalaakay sharaf ku leeyahay waalidkay,war kasta oo aan ka ho waa waxba kama jiraan,haddii aan ka hor imaada na waxa qasab ah in aan bannaanka ka ahaado"

"haddii ay arintu sidaas tahay waa qasab in aan falka noogu haboob qaado"ayey ugu dambeyntii tiri iyadoo shakisan.wuxuuna la socodsiiyey sida ay guriga ku iman lahayd iyo waqtiga ay isku aadin lahayd oo uu ugu dooray in ay noqoto habeenka jimcaha oo waalaalkii lagu marrin doono gabadh uu soo xushay isaga,sidii uu u siiyeyna ayey u qaadatay.

Guriga axmed waxaa isugu yimid dad ay tiradoodu aad u badan tahay oo isugu jira dhallinyaro iyo waayeelba.waxay ka soo wada qayb galeen xafladda nikaaxa xasan iyo sahra oo la go,aamiyey in uu meherkood dhaco habeenka 8:00.



Odayaashii ka socday sahra dhinaceeda iyo kuwii saxan ayaa isugu tagay qoklii uu ku jiray wadaadkii isku mehrin lahaa.saalax wuxuu ka mid ahaa dadkii fadhiyey sugayeyna inta uu nikaaxu ka dhacayo.dadka intiisa kale waxay joogeen barxadda guriga?halkaasoo sawaxan farxadi ku jirto la isla dhexmarayey.

Caasha oo dirqi kaga soo baxsatay nimankii iridkaytaagnaa ayaa gurigii soo gashay iyadoo indhaha taagaysa ayaa waxaa meel dheer ka arkay daadir,dhinaceedii ayuuna soo aaday"maxaa kaa magnaa caasha"ayuu durbadiiba weydiiyey.

"yaah"ayey ku muujisay in ay ka naxday"haa,Daadir ,aaway xasan"

"odayaasha ayuu la soo ogaanayaa meherka "ayuu si daacd ah u jawaabayisagoo u maleynaya in uu Saalax marti qaaday.

"aboowe,isagaan rabaa ee iigu yeer" ayey ka codsatay.

"maxaa ku dadajinaaya?"ayuu si,aalay. waxayna u sheegatay in uu xasan uur u yeelay,uunaku inkiray,ayna dooneyso in ay ku dacweyso waalidkii.Daadir oo amankaagsan ayaa damcay in uu dajiyo,oo uu ku qasbo in ay waqti kale u soo noqoto,laakiin waxay ku adkaysatay in haddii aanu si gaar ah gu yeerin,ay iyadu abbaarayso qolka uu ku jiro.ugu dambeyntii waa uu ka yeelay.

Axmed ayaa soo baxay isagoo yaaban,ma-

skaxdiina mashquul ku tahay ciddda dooneysa.

Caasha oo taagnayd meel in yar u jirta albaabkii uu ka soo baxay Axmed ayaa oohin iska qabsatay kolkii ay aragtay in uu kusoo socdo iyada.

"maxaa helay gabadha?"ayuu Axmed weydiiyey Daadir oo dhinac socday.

"adeer waxay sheegaysaa in ay uur u leedahay Xasan"ayuu ugu jawaabay.

"yaah?"ayuu ku fajacay,intii uusan hadal kale oranna wuxuu la taagnaaa inantii, Daadir ayaana is baray labadoodii.

"haa,adeer waa run oo wiilkaaga ayaa ii been abiiray"ayey cod qafiif ah ku tiri, iaydoon joojin oohinteedii.

"waa kuma?"ayaa odaygii su,aalay inantii.

"Xsan Axmed "ayey ugu jawaabatay.

Axmad isa oo qosol gariiraya ayuu yiri "gabadheydiiyey ninkaasi ma aha nin ay waxaasi ka suuroobaan ee maxaad ku haysataa?" waxay so bixisay warqadihii jawaabta,fartana ka saartay odaygii iyadoo u xaqiijinaysa in ay uur leedahay.intuu fiiriyey warqadhii ayuu ku jeestay Daadir una sheegay in uu u yeero Xasan,isagana sidii la faray ayuu yeelay.Saalax oo ogaa arinta walaalkii loogu wacay ayaa ka soo dababaxay,waxayna isku mar wada yimaadeen halkii aabohood iyo Caasho taagnaayeen,oo aad ugu dhoweyd albaabkii qolka culihada iyo odayaashii sharafta hudnaa ay ku jireen.



"waryaa Xasan,ma taqaanaa gabadhan?" ayaa Axmed si kulul u weydiiyey wiilkiisii isagoo rumarsan la, waxa uu saaxiibkii uga sheegay markii uu soo wacayey.

"haa aabe"ayuu si ka fiirsasho ah ugu jawaabay.

"ma horey baad u wada socoteen?"

"maya"

"weligaa ma u tagtay?"ayaa odaygii weydiiyey isagoo aad u kacsan.

"waa iga xaaraan"ayuu run ahaan ugu cadeeyey.

"horey ayuu iigu soo inkiray"ayey iyadoo oyneysa kaga soo dhex gashay wareysigii;

"yaa kaaga marqaati ah in aad wada socoteen?"ayaa Axmed oo far la qabto aan lahayn weydiiyey gabadhii.markii uu hadalku intaa marayo,ayaa dadkii ku jiray qolkii nikaaxu ka dhici lahaa soo wada baxeen iyagoo buuca socda la yaaban,Sahra oo ka mid ahyd dadkaas waxay ku tiirsatay albaabkii qolka iyadoo ka xishooneysa raggii meesha tubnaa soo dhex galkooda.

"wiilkaan baa ii marqaati ah"ayey tiri caasha iyadoo tilmaameysa Saalax.

"war maxaa ka jira warkaan la sheegaayo?"ayuu Axmed weydiiyey wiilkiisa isagoo isku dhex yaacsan.

Saalx madaxa ayuu hoos u laadlaadiyey, isagoo dareensiinaaya aabihii in walaalkiis dambiga uu galay,laakiin aanu sheegi karin.

"waryaa hadal baan ku idhi"Axmed ayaa

ku amray.

"aabe waxaan habeen guriga ugu soo galay iyagoo ay wada saaran yihiin sariir"ayuuna wala lkiis kaga baan abuuray.

"waryaa Xasan"ayaa odaygii ku qayliyey.

"haddaadan i aaminsaneyn weydii gabadhaa?"ayey kaga kala goysay hadalkii,iyadoo caasha fartaa ku fiiqaysa Sahra oo taagnayd dadka gadaashiisa,laha yaabanayd waxa meesha ka socday iyo in gabadha doodeysa ay tahay gabadhii halka habeen ay ku aragtay Xasan.

Axmed intuu qaboobay ayuu u soo dhaqaaqay xaggeedii,wuxuuna tartiib u weydiiyey waxa ay ka og tahay arinta la isku haysto isagoo u sheegay wixii ay ahayd.dadkiiayaa dhegaha u wada taagay waxa afkeeda kasoo yeedhi doona.

"waxaan xusuustaa in aan habeen arkay iyagoo isku madhan"ayey tiri,iyadoo uu hadalku diriq ku yahay,eray kalena aan odhan bayna orod uga baxday guriga.

"aabe---"ayaa Xasan gees kaga soo yeedhay.in fara jir jir lagaga dhawaajiyo ayaa jawaab u noqotay.

"hana aabaysan garacyahow wasaqa ah"ayuuna qaylo ahaan ugu daray .

"aaba---Axmed---"ayuu haddana Xasan ku celiyey.

"noo daa magaceena oo raadso wixii ku dhalay annagaabe awah soo korsanaye mid walidkii dhalayba ay soo naceen iidhaaf gu-



rigayga"ayuu AXmed yiri isagoon is ogeyn, xasiloonidiina ay ka luntay.

"Axmed sidee bay ka boqotay"ayaa Cali damcay in uu ku qaboojiyo isagoo gacanta ka qabanaaya.

"haa,awlba dhiiga yaga ma ahayn oo ahaa ku tiir iyo tacabbba beelay nin odaygii dhalayba uu raaxa ka do rtay"ayuu ku yiri Cali isagoo iska filqaya.

Cali muddo daqiiqado ah wuxuu ahaa mid ay maskaxdiisu ku maqan tahay xusuus,oo wax fal ah aan ka qaban goobtii ay rabshadu ka dhacday,wuxuu kaacararay meeshii ay rabshadu ka dhacday,isagoo abbaaraya qolkii uu saaxanayey sidii nin alaab muhiim ah meel aan xafidaad lahayn uga soo tagay oo kale. isla markii uu soo galay qolkiisii ayuu la soo baxay albunkii uu ku arkay masawirkii Xasan yare oo uu muddaba ka shakisanaa. meeshii uu ku jiray ayuu ka soo saaray hurayna uu ka gadiyey si uu u arko sawirka dhabarkiisa oo ay ku qornayd magaca Xasan Cali,hooyada magaceedana Xaawo Cabdi,sanadka dhalashada uu yahay 28/3/58.Cali wuxuu qaban la aa waxay noqotay in uu rogrogo sawirkii isagoo rumaysan la, in uu Xasan wiilkiisa yahay,wuxuuna isku dayey in uu isku daro qaylo iyo orod,markuu jeestayna wuxuu u dhacay afgambi.

Intii uu Cali ku magnaa "YA" Axmed oo qof qabta la waayey Xsan kaga saaray Aqdaanqadiid guriga,daqiiqad kaddibna saaxiibkii

Daadir ayaa ka soo daba baxay wase uu arki
waayey xxx muuqaalkiisii.

Cumar iyo Gamca dheere oo ordaaya ayaa
isugu yimid qolkii Cali albaabkiisaiyagoo
uu mid walba goonidiisa u baadi goobayey
Cali ,intay is eegeen ayey iyagoon isla ha-
dlin gudaha u dhaafeen qolkii,waxay arkeen
Cali oo weji weji dhulka u yaalla,dhiigna
uu ka baxayo,gacanta bidixna ku haya sawir.
intay soo qaadeen ayey u soo kaxeeyeen is-
bitaalka iyagoon ogeysiin cidna.

Xsan oo darbiga guriga saaxiibkii Da-
adir fadhiya aadna ay maskaxdiisu uga dhex
dhexwaaqeyso hadaladii aan ka fiirsashada
lahayn ee uu aabihiis ku qaylinaayey,wuxu-
una kala garan waayey in ay run ka ahayd
iyo in uu xanaaq ka keenay xitaa haddii ay
dhab tahay waxaan maankiisa ku soo noqnoq-
oneysay meesha uu waalidkiis jiro in ay dh-
inteen iyo in ay nool yihiin iyo halka uu
ka raadin lahaa haddiiba ay nool yihiin.

Kolkii uu madaxa kor u soo qaaday ay-
uu arkay gabadhii sababta u ahayd halka uu
joogo caawa oo meel hortiisa ah mareysa,is-
agoon arbushin ayuu dabagalay.

Saalx oo sii eegaya Caasha oo ay mar-
kaa kala tageen ayaa isna soo daba galay
markii uu arkay walaalkii oo daba socda
inantii isagoo u qaatay in uu Xsan doonaa-
yo in uu gabadha u gacan qaado.

Caasho waxay gashay albaab ood ahaa
oo ku wareegsanaa seddex qol oo cariish ah,



qolkeedii ayeyna madaxa la gashay,horayna
waxay isaga tuurtay sariirteedii.wax yar
goortii ay saarnayd sariirtii ayey dareen-
tay humaag dul taagan ,markay si fiican u
fiirisayna waxay ogaatay in uu yahay Xasan;
hareeraheeda intay fiirisay ayey la soo bo-
oday kal sariirta dhinaceeda tiil iyadoon
la hakanna la dhacday kashii.seddex jeer
kolkii ay ku dhufatay garabkiisa ayuu iska
qabtay tii afaraad isagoo yaaban sida ay a-
gabadha ka noqotay .Saalax oo ku dhakanaa
iridka dhinicii isa ayaa damcay in uu soo ga-
lo markii uu maqlay jugta weyn ee ka dhex
yeertay waxaase joojiyey codka walaalkii
oo leh3"Caasha,maxaa kugu dhacay"

"iiga bax gurigayga"ayey ku dhawaaqd-
ay iyadoo oyneysa.

"maya adoon ii sheegin marka hore wax-
xa kugu qasbay in aad dusha iga sartid uur-
aanan lahayn --kaama tagayo"ayuu weydiiyey
oo ku adkaystay Xasan.

"ammaan isii wiil yahow"ayey ku ahbi-
say .

"haddaad rabto in aan kaa tago ii sh-
eeg runta"ayuu mar kale ku celiyey.

Ugu dambeyntii sidii uu ugu qasbaayey
ayey u sheegtay in uu uurka leeyahay Saal-
ax,Xasanna waxay ku noqotay wax aan dhici
karin ,inkastoo uu markii dambe ku qancay
sidii ay ugu sheekeysay.

"Maxaa kugu kaifay Xasanoow,inaad adiga iyo walaalkaa nakala dhexgasho,"ayay waydiisay markii ay dhamaystirtay hadalkii uu kadoonayay .

" Waxaa igu kalifay jacayl aan u qabo walaalkay,waayo waalaka kaliya ee aan dunida kaffirsanay. Adigana waxaa la iiga kaa sheegay inaad tahay qof camalkeedu yahay inay dhalinyarada shaxaado" -

- Markii aan ku bartayna waaad lahayd a dabeecadii lagugu tilmaamay,anan waxaan jjeulaystay inaan walaalkay kadhigan mustaqbal qof noocaas oo kale ah ,inkastoo aan rabay inaan aad u niyad jebiyo kolkii aan dareensiiyay,walow aan adigaba been kuu sheegay ..." Iyadoo ilmaynaysa ayay gacanta kasoo qabatay isagoo hadalkii u wada una soo hogaamisay barsadii uu aabaheed jiifay oo u furnaa kii ay joogeen.

Xasan kolkii uu arkay odaygii ayuu u dhalaalay sidii barafka raxmad darteed markii ay u sheegtay in ninka uu kanaxay sida uu u yaalo aabaheed ayahay ayay ku soo celisay halkii ay kateegeen.

Markiiba Xasan wuxuu aqoonsaday sababta ku kaliftay gabadha inay wax shaxaado, wuxuuna waydiiyay isagoo aad moodo in cunaha loo fadhiyo, inay hooyadeed nooshay iyo in kale .

" Maya,Hooyadeey waxay geeriyootay shan sano kahor"ayay ugu ja aabtay,Xasan intuu is hayn waayay ayuu kusoo booday gabdhii, garka intuu ka  qabsaday ayuu cafisweydiistay,waxayna u sheegatay inaanu waxba u qabin ee uu iyada cafiyo,sidoo kale ayuu isna u sheegay in ay xaggiisa cafis ka tahay.

"maxaad adiga iyo Saalax ku soo kala tagteen hadda?"ayaa xassan weydiiyey aamusnaan yar kaddib.

"wuxuu ii sheegay in aan dib dambe agtiisa u soo istaagin,haddaan indhaha dhiig ka keenan- aanu i guursaneyn,dantii uu iga lahaana uu iga gaaray"ayey ku jawaabtay cabbaar kolkii ay hakatayna raacisay"laakiin waxaad vallan ku qaaday in aan sidaan yeelaba aan ku fadeexadeeyo aabihii hortiisa"

"walaalay waan ku baryayaa ee ha sameeyn taas"ayuu yiri Xasan isagoo jilbaheeda ku dhegaaya,markii uu hadalku ka sii dhammaanayey"haddii uu aabahay ogaado waxaa hubaal in aanu Saalax nabad ku sii joogeynin addunyada oo waad ogeyd wixi igu dhacay aniga,mana u adkaysan karo intii oo kale ayaa walaalkaa soo gaartay"

"guurna anaa diyaar kuula ah ee walaley sirtaa aniga iyo adiga oo kaliya uun ha inagu koobnaato"intay garbaha kasoo qabsatay oo soo istaajisay ayey ku tiri.

"Xasan aboowe aad iyo aad baad u mahadsan tahay,waxaanan la yaabanahay aarsasho la,aanta xumaantii laguugu sameeyey,anigoo huba in maanta ninkii dhallinyaro ah ee sidaas oo kale lagu sameeyo aanu u dег-

ganaadeen sidaada oo kale"

"Caasha"ayuu yiri isagoo dareenkeedii oo dhan dhankiisa u soo jeedinaaya"Saalax waaba walaalkay laakiin xitaa haddii uu nin kale ahaan lahaa kama aan aarsadeen,waayo waxaa jirta odhaah tiraahda dhibka aad geysataa wuxuu keenaa dhib kale uun iyo mid kale oo odhaneysa khald lagaa galay o aad halmaantaa waa aarsashada ugu weyn,marka walaaley waxa keliya ee aan kaa codsanayo waa in aadan wax tillaab ah qaadin illaa laga gaarayo maalinta berrito ah oo aan sallaaddii ku soo mari doono,barqadiina haddii uu cebe idmo waxaa lagu odhan doonaa waa xaaskii Xasan"Saalax oo hadalladii dhegihiisa ku soo dhacayey uu ahaa marba marka kasii dambeysa kuwo aanu awood u lahayn in uu qaato ayaa guriga laabkiisa ka caray kolkii uu dareemay in ay soo socdaan,Xasanna wuxuu cCaasha kusii adkeeyey ballantii uu u dhigay,isagoo xusuusiyey in ay aaminto.

Subaxnimadii hore ayuu Xasan ka soo toosay gurigii daahir oo uu habeenkaas seexday kuna soo kallahay aqalkii caasha,isagoo isku halleynaaya qarash yar oo jeebka ugu jiray.markii uu soo gaaray ayaa Canab ka hor timid una sheegtay in ay walaasheed raaxday wiil farriinna u reebtay,taasoo ah in ayan ka baxayn arintii ka dhaxaysay isaga iyo iyada,kana raalli ahaado maqnaanshaheeda,isna intuu gabadhii u mahad celiyey ayuu isaga soo laabtay halkii uu ka tagay.



Intaanu gurigii soo gaarin ayuu meel dheer ka arkay saaxiibkiiDaahir oo shukumaan garabka u saaran yahay lana hadlaaya oday,kolkii uu soo dhowaadayna wuxuu arkay in uu yahay Cumar Madoobe,wuxuuna aad ula fajacay waxa uu soo doojay.

"adeer,Cumar subax wanaagsan"ayuu dhabarkiisa kaga salaamay.

"subax wanaagsan"ayaa odaygii ku celiyey "xalay oo dhan baan ku baadi goobayey waxaana aad u xanuunsan cabahaa"

"sidee yahay hadda "ayuu su,aalay.

"u maleyn maayo in aan naf ku gaareyno ee ina keen aduu ii kaasoo dirayo"ayaa Cumar ku jawaabay,isagana hadal kale isagoon odhan ayuu daba galay odaygii.

Isagoo yaanan wax su,aal ahna aan weydiin ayaa la keenay gurigii Cumar Madoobe isagoo filaayey in loo hogaamiyo kii aabihii Axmed.wuxuu galay qolkii uu Cumar uga hormaray,waxaana mucjiso ku noqotay in uu ku dhex arko Gamca dheere,xaaskii Cumar iyo Cali Mire oo sariirta saaran.daqiiqad' ayuu tallaabo qaadi waayey markii cali mire yiri"kaalay Xasan,kaalay wiilkaygiiyow"

Isagoo fajacsan ayuu ku soo fariistay sariirta qarkeedii,Calina isagoo aan erey odhan ayuu u dhiibay sawirkii,kana tusay dhabarka waxa ku qornaa.Xasan kolkii uu ka arkay sawirkii magaciisii iyo magacii aabihii,magacii hooyadii iyo goortiii uu dhashay iyo xilligii laga qaaday sawirka

ayuu weydiiyey Cali meesha ay hooyadii jirjirto iyo sababta isaga oo nool ku kalliftay in wiilkiisa reero kale soo korsadaan; calina wuxuu uga sheekeeyey sidii ay wax u dheceen oo dhan,isagoo la socodsiiyey in aanu garaneyn halka ay hooyadii ku dambeyso.

"Xasan waxaan kaa codsanayaa in aad iska kay cafiso"ayaa odaygii weydiistay wiilkiisii. -

"aabe,cafis baad iga tahay"ayuu si gaaban u yiri .

"Xasan inkastoo aan waayeel aan cilmi lahayn ahay,waxa aan ku hadlaayo ama aan sameynaayo aaney qiimo lahayn,waqtigana kaa luminaayo adigan,ayaan wiilkaygiiyow kaala dardaarmayaa hal shay oo qur ah kaasoo aayatiinkaaga dambe wax anfici doona ah,taasoo ah in aad u hubsato tallaabo kasta ee aad qaadeyso,dhallinyaranimaduna aaney ku la tagin,waayo waxaa aniga caawa tii alla ka spkow saan iga dhaigay hubsasho la,aan" ayuu Cali ku hamaansaday,isagoo ay nafta kasii baxayso,xasanna uu wr kale ka sii sugaayo,gamca dheere oo yaasiinka markii seddexaad ku aqrinaayey ayaa dareemay in ay naftii deysay,intuu soo istaagay ayuuna isku toosiyey kuna duubay maro cad,waxaana sla galabnimadiiba lagu soo aasay qabuuraha M.NUUR ee KM.13,duugtiisiina waxaa ka soo qayb galay ehelaadiidii iyo dhammaan asxaabtiisii,waxaa keliya ee ka maqnaa AXmed



iyo xaaskiisii oo xitaa gabadhoodii fartuun waxay ahayd goob joog,tacsidiina waxaa laga dhigay seddex maalmood,maalinnimadii axadda ayeyna ku ekaatay.

Axmedna xabeenkii xafladda kaddib caafimaadkiisu ma wanaagsaneyn,wuxuuna aad ulasii muruheysnaa halka uu saalax aaday oo aan habe nkaas kaddib dibba koo arag,loogana maqal wax war ah.subaxnimadii isniinta ayaa axmed ka soo toosay hurdada isagoo sidii hore dhaama,wuuna qabtay telifoonkii oo markaas soo dhacay.

"hello waa gurigii axmed"

"hello aabe "ayaa soo hadlihii ku celshay"ma saalax baa "ayaa odaygii ku qayliyey "haa,aabe ii waran!

"waa nabad laakiin xaggee ka soo hadleysaa?"ayuu si aan degganeyn u weydiiyey.

"marka,waxaanan aabe ka xumahay in aan telifoon kuugu sheego in aan gabar mehersaday"

"yaah"ayuu axmed oo naxay yiri,isagoo hadal,kale oo kulul celi is leh ayuu soo xusuustay tii ka racay xasan.

"hambalyo wiilkaygiiyow ,waxan jeclaan lahaa in adinka oo wada socda aad guriga iigu timaaddaan"

"laakiin aabe ii ballan qaad in aad qalbi furan igu soo dhoweyneyso"

"waa ballan"

"haddaba waxaan idinku soo beegannahayII:OOsubaxnimo,haddii eebe aqbalo.

"waa hagaag waana ku sugayaa"ayaa axmed ku adkeeyey wiilkiisii,kuna celiyey telifoonkii halkiisii.

Waqtigii ballanta kolkii la gaaray ayaa saalax iyo gabadhii is nikaaxsaday ka soo galeen albaabkii weynaa ee guriga,iyadoo lawada sugaayo cid shaqo aadayna aaney jirin.

Axmed kolkii uu indhaha saaray wiilkiisii ayuu ku booday isagoon eegin qofkii la socotay,markay in dhumkadeen kaddib ayaa saalax baray gabadha uu soo mehersaday.

"miyaaney tani ahayn caashadii sheegatay in uu xasan xumeeyey,adna aad ugu marag furtay?"ayaa axmed weydiiyey isagoo laba tallaabo dib u qaadaya.maka iyo gabadhoedii fartuun oo u soo dhaqaaqay in ay gacan qaadaan saalax iyo inantii la socotay ayaa iyana hakaday.

"haa aabe"ayuu si gaaban ugu jawaabay.

"haddaba maxaa kugu kallifay in aad soo mehersato adigoo ‡ as ogsoon?"

"aabe,waa sheeko dheer"intuu yiri saalax ayuu uaga sheekeeyey wixii dhacay oo dhan iyo in uu isagu lahaa qaladka xasan lagu eedeeyey,kuna qasbay caasha in ay dusha ka saarto walalkiis"aabe waxaan u qaatay in uu xasan ahaa cadawga keliya ee aan leeyahay, balse waxaan gadaal ka ogaaday in uu yahay nin jeccl wanaagayga iyo kiinaba,wuxuu ahaa mid kabahayga tala intii aan qabrigiisa qodayey"intuu hadalkii wadi waayey ayuu garabkii aabihii oohin kula hdcay.



axmedna intuu madaxa u salaaxay ayuu si wanaagsan u dejiyey.saalax kolkii uu qaboobay ayuu su,aalay aabihii sida ay ku maslixi lahaayeen Xasan oo isagu si gaar ah qalad ugagalay.odaygii inta uusan jawaabin ayuu aalarkay xaaskiisii iyo gabadhiisii oo ilmaynaya,dhinacoodii ayuuna soo aaday,wuxuuna weydiiyey wixi helay.

xasan in aanu falkaas oo kale sameynin waan ogaa,laakiin waxaan la yaabanahay sida aad u fududaatay"ayaa maka ugu jawaabtay iyadoo weli booyeysa.

"maja caano qubtay laguma dul ooyo"ayaa axmed yiri"ee hadda sidee baynu u raalli gareynaa?halkee baynuse ka heli karnaa xaawa xasan?"

"aabe,anigaa garanaaya meel uu joogo, waxa uu la nool yahay saaxiibkii daahir,laakiin---eh---ih--"ayey tiri fartuun iyadoo awood u weyday in ay dhameyso hadalkii oohin darteen.

"laakiin hee?"ayaa axmed su,aalay isagoo garbaha ka qabanaaya gabadhisii.

3"laakiin---eh--ih--ehaabihii--cali mire--ayaa geeriyoodey"ayey tiri iyadoo hadalka kala goygoyneysa.

"innaa lillaahi wa innaa ileyhi raajucuun"ayey maka tiri ,waxayna su,aashay"ma cali mire ayaa aabihii ahaa?".

"haa hooyo,wuxuuna xasan maalintii aaska iga xodsaday in aanan idiinsoo sheegin dhimashadiisa,isagoo idinkaga turaayey dhi-

bka tacsida,waxaana gogoshii tacsida la laabay shalay"ayey fartuun ku jawabtay.

"waxaan tala ahaan ku soo jeedinayaa in hooyo iyo fartuun u tagaan xasan soona raalli gareeyaan"ayaa saalax la soo boodday waana la isku wada raacay.

Galab dheerkii ayaa saalax iyo aabihii yimaadeen guriga caasho,halkaas oo ay ku xaal mariyeen aabaheed,iyagoo u sheegay in ay uga baahan yihiin in uu gacantooda u dhiibo iyagoo faraxsan ayuuna ogolaaday,ducana ugu daray.markey taas ku guuleysteen ayaa iyagoo wada jira oo cashana wehliso soo mareen gurigii sahra.

Maka iyo gabadhoodii fartuun waxay markii ay salaaddii dukadeeda sii aadeen aqalkii uu xasan joogay,nasiib wanaagna wuxuu ku ahaa xaadir waayowuxuu habeenkaas filayey walaashii fartuun oo si xariir ah ugu iman jirtay,si fiican ayuu u soo dhoweeyey,isagoo aad ugu riyaaqay booqashada ay hooyadii soo siyaaratay,cabbaar kolkii ay sheekeysteen ayaa maka uga tacsiyeysay wiilkeedii dhimashadii aabihii ,iyadoo u sheegtay inuusan keligii ka dhiman ee iyaga oo dhan ka geeriyooday ,isagana wuu qaatay isagoo soo xusuusiyey in ay dhimashadu waajib ku tahay naf-walba in ay markeeda arakto,in yar kaddibna waxay ugu bushaareysay in walalkiis saalax uu soo mehersatay gabar iyadoo u sii tilmaan tay qofkii ay ahayd,intaad kaddib ayaa hooyadiis ka codsatay in uu u raaco x



oo lagu wada sugaayo ,iyadoo in laga wada xun yahay qaladkii laga galayna u sheegtay;

Xasan wuu ku diiday,isagoo uaga mahad celiyey heer ka ay maanta soo gaarsiiyeen, kuna celceliyey in wax dhibaato ah aan loo geysan ee ay isaga ka gaarsiiso in ay cafiyaan ,isagoo aaminsan inuu ka galay dambi weyn.dood dherr ka dibna waxaa maka ay ku guuleysatay in uu soo raaco isagoo niyad furan.intii jidka lagusoo jiray ayaa Xasan weydiiyey maka haddii ay taqaano meesha ay hooyadii jirto,waxayna u sheegtay in ay geeriyootay isagoo sanad jira,dardaaranna ay reebtay,taasoo loogu sheegi doono guriga, ugu dambeyntii way yimaadeen.kolkii ay irridda ka soo galeen ayaa saalax oo sugaayey shanqartiida kaga hor yimid albaabkii,kuna booday walaalkii isagoo cafis weydiisanaya. in ayaan waxba isku qabin ayeyna labadoodu isku sheegeen iyagoo dhabanka iska dhunkanaya.in yar kaddibna wuxuu xasan ku booday aabihii,si wanaagsanna isaga raalli gareeyey.

Daqiiqado kaddib ayey iyagoo wada dhaan soo galeen qolkii fadhiga,cabbaar markii lagu sheekeysanaayey ayaa maka caddeysay in xasan uusan u soo raacin in uu alkan ku sii waaro,ee uu u noqonaayo gurigii uu kula noolaa saaxiibkii.

Axmed baase ka xanaaqay oo ku amray xasan in aanu dhinac uga dhaqaaqi doonin halka uu joogo haddii nafta been ah ilaah-

ay uwada da yana uu la noolaan doono iyaga, isna wuu ka aqbalay isagoo u dheegay in aanu war ku soo celin karin aabihii. Waxyar kaddibna, axmed iyo maka waxay gees ula bexeen xasan, iyadoo ay kuraasta ku soo hareen saalx, caasha, iyo fartuun, waxayna la socodsiiyeen in ay hooyadii kala dardaarantay iyaga, ballantii ay la qaadeenna inta ay nool yihiin jecel yihiin in ay adkeeyaan iyagoo qoslaaya ayeyna fadhigii ku soo laabteen.

"soo bax walaale," ayaa saalax la soo booday. markii uu arkay xasan oo soo dhinac fariistay; xasan oo yaaban baa daba galay saalax oo gacanta ka hayey, laba tillaabo kaddibna wuxuu weydiiyey halka uu u hillgaamînayo.

"aaboowe," ayuu ku jawaabay saalax "waad jeclaysatay in aad nafsaddaada u hurto sidaad ceeb igaga badbaadin lahayd; anna taa abaalkeedii ayaan maanta ku soo siinayaa" xasan intuu aamusay ayuu iska sugay bal shayga la gudoonsiin doono. waxay soo gaareen qolkii ay ku noolaan jireen waagii ay ardaydа ahaayeen, saalax intuu albaabkii furay ayuu ku xooray xasan qolkii sugdiga ahaa, iriddana korka uga xiray.

Xasan oo gurìga kala yaqaanay ayaa kaga dhawaajiyey farihçi halka, qolkii oo dhanna wuxuu noqday iftiin. tartiib ayuu u sîsha ula raacay, waxayna indhihiisu ku hakadeen qof dumar ah dhabatkeeda, oo ku fadhisa sariirta dusheeda.



indhihiisii ayuu marmaray sidii in uu arkay wax aan jirin oo kale, laakiin weli waa sidii. si degaanaansho leh ayaa gabadhii usoo jeesatay, waxaana ka hor yimid weji quruxdiisa ninkii arkaa uu dhalaali lahaa sidii barafka. inantuna waxay ahayd tii uu niyadda gashaday haddii uu hel haheen la qaybsan lahaa nolol aanu dunidaa weyn oo dhanba wax uga baahnaadeen.....waxay ahayd Sahra Aadan.

## QUTUBKA TOBNAAD

Miiskii dheeraa oo cuntada oo ay casho saaran tahay ayaa la isugu yimid, iyadoo ay dhinac ka soo jeedaan xasan, saalax, sahra iyo caasha; dhinaca kalena axmed, maka, iyo gabadhoodii fartuun. cashadii hortiiley ayaa si farxad leh loo wada cunay, markii la dhammeystay kaddibna axmed ayaa ka codsaday in ay soo wada galaan qolka fadhiga halkaasoo uu kula hadli doono.

Kolkii ay salka kuraasta la wada heleen ayuu axmed soo xusuusiyey wiilashiisii ballan uu hadda ka hor ka qaaday taasoo hahayd abaal marintoodii guuleyssiga dugsiga sare, inkastoo aanu markii hore caddaddee'a sheegin haddana wuxuu la socodsiiyey inuu ku abaal marin doono aroos lala cajabo. markii la isku raacay kaddib, ayaa fartuun oo dhoolaha ka qosleysa weydiisay afartii is guursan lahad inuu ku jiro qof aan ku kicin fal uusan ka fiirsan, in aanu jirin ayeyna

ku jawaabeen afartiidiiba.iyadoo taa cuskaneysa wyey soo jeedisay in guriga xaflad -da arooska lagu qaban doono lagu dhejiyo tabeele weyn oo ay ku qoran tahay "IN LA HUBSADO HABOONAA"qof waliba qosol ayuu la sii jeestay waana lagu wada raacay.

Habeennimadii jimcaha waxaa dhacay xasan hikaaxiidii,todobaad kaddibna waxaa la qabtay aqal galkii afartoodii,iyadoo lagu dhigay guriga axmed oo lagu xidhay nallal kala jaad jaad ah iyo tabeelihii ay fartuun soo jeedisay in guriga la dhigo.

Xafladdiina waxay ku dhamaatay farxad iyo reyn reyn,dadkii ka soo qayb galayna waxay ka soo baxayeen iyagoo aad u farax -san oo mid walibana uu qoshaayo ,gadaalna usii fiirinaaya tabeelihii ifaycy ee ay kuu qorneyd"IN LA HUBSADO HABBOONAA"

--dhammaad--

Waxay Sahro Aadan, oo Illaahay qurux iyo dabeecad u ekeeyey, ka aamin baxday raggii oo idil iyadoo ka tusaalo qaadanaysa hablihii la xaafadda ahaa oo in la marin habaabiyey wada sheegtay.

Iyadoo sidaa uga foojigan ayay la kulantay Xasan Yare, oo isna ka dhawray nafsadiisa wax ka baxsan shaqadiisa.

Kulankoodii ka dib, waxay labadoodiiba dhex-galeen nolol cusub oo aan midkoodna horey waayo aragnimo ugu lahayn.

Kolkey gaareen heer lagu daydo iyaga, ayaa Sahro u qarsatay inay ku socoto wadiiqadii gabdhihii la xaafada ahaa ka sheegteen tálaabo deg-deg ah ayay qaaday. Laakiin fal kasta oo la qabanaayo..........

# *In La Hubsado Haboonaa !!*

Taxanaha Buuggaagta
**MAC**

Dhalanteed
**C.C.G.**